FSNAU
Food Security and Nutrition Analysis Unit-Somalia

# Hubinta Cuntada Nafaqada

Lasoo saaray
Bishii 2aad, 2011

## Warbixin gaar ah – Falanqaynta - *Deyrta* 2010/11 kadib

Waxay xogtan kooban ee FSNAU ee khaaska ah ku siinaysaa waxyaalihii ka soo baxay kormeerkii Deyrta 2010/11 iyo falanqayntii oo urursan, oo ah wixii kasoo baxay hawshii loogu baxay dhulka miyiga (Bishii 12aad 15, 2010 - Bishii 1aad 6, 2011); waab-shaqeedkii falanqaynta heer qaran (Bishii 1aad 9 - 21, 2011); iyo sugitaankii farsamo iyo kulamadii usoo bandhigidda hayadaha wada shaqayntu wadaagno (Nafaqada, Bishii 1aad 24, 2011 iyo Sugnaanta Cuntada, Bishii 1aad 26, 2011). FEWSNET Somaaliya ooy wehliyaan 103 hawlwadaagayaal, oo isugu jira masuuliyiinta gobollada, Qaramada Midoobay iyo hayadaha caalamiga, iyo hayadaha samafallada ee madaniga iyo caalamigaba ayaa ka qaybqaatay taageerayna hawlgalkii kormeerka iyo falanqaynta Deyrtan 2010/11. Waxay FSNAU ku soo bandhigtay natiijooyinkii Nayroobi kulankii khaaska ahaa ee lagu qabtay xarunta Waaxda Taageerada Soomaaliya Bishii 1aad 28, 2011 laguna soosaaray warsaxaafadeed isla maalintaa. War saxaafadeedka iyo xogtii lasoo bandhigayba waxaa laga helyaa shabakadda FSNAU (www.fsnau.org)..

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Colaada Sokeeye

Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

Iskudhafka Falanqaynta Sugnaanta Cunnada

### Natiijooyinka Ugu Muhiimsan

Natiijada ay FSNAU, FEWSNET iyo hawlwadaagayaalka ay kasoo saareen kormeerkii xilliga *Deyrta* 2010/11 ayaa muujinaya tirada dadka ee u baahan gargaar baniaadminnimo ee ku sugan Soomaaliya ayaa kordhay 20 boqolkiiba ilaa 2.4 malyuun. **Waxay middani u dhigantaa 32 boqolkiiba dadka Soomaaliya oo lagu qiyaasay 7.5 malyuun oo qof.** Roobabkii xilliga Deyrta ee baaqday oo la xiriirinayo dhacdooyinka La Niña ayaa asiibtay Soomaaliya, sababtayna biyo la'aan ba'an oo ka jirta dalka intiisa badan marka laga reebo gobollada galbeedka waqooyi. Xaaladan qallaylka ah ayaa iyana sababtay in dalagga intiisa badan aanu kasoo gu'in gobollada dalgga kasoo baxo ee Bartamaha iyo Koonfurta. Sicirka aad u kacay ee biyaha iyo furuda dalka ayaa ah waxyaalaha muhiimka ah ee sii xumaynaya xaaladda sugnaanta cuntada ee Soomaaliya. Waxaa xaaladda sii bi'iyay colaadan joogtada ah, oo weli ah ta ugu muhiimsan sababta barakacu u saamaynayo qaybo ka mid ah koonfurta iyo bartamaha dalka. Waxay FSNAU cayimaysaa in ku dhow 910,000 qof oo dalka gudihiis ku barakacsan ay yihiin dad isku mid ah oo dhibaataysan; waxaa ku darid mudan, **940,000 oo qof ayaa ku sugan Dhibaato Cunno iyo Habnololeed Ba'an (DCHB) iyo 535,000 oo iyan ku sugan Gurmad Bani'aadminimo (GB)** ayaa ku urursan dhulalka miyiga iyo magaalooyinka. Dulka miyiga, dhibatada baniaadminimo ee ballaaran ee ka jirta ayaa saamaysa hal malyuun oo dad ooy abaaruhu saameeyeen ooy wehlyaan reer guuraaga cayroobay oo hadda lagu qiyaaso 45,000 oo qof (7 boqolkiiba ayay korortay *Gugii* 2010). Waxa kororkan ugu wacan xaaladda sii xumaatay ee Deexda iyo Beer-xoolo dhaqatada Bartamaha (Digir Tabcatada) oo dhibtooday dhowr xilliyoo isku xigxiga oo abaar ah. Waxaa wehliya, 475,000 qof oo reer magaalka saboolka ah oo si ba'an uga ciriiryoon awoodda waxiibsiga uguna wacan tahay sicirka cunnada ee sare isu shareeray ayaa iyana dhibban. Xaaladda nafaqo ee Soomaaliya ayaa iyana kasii daraysa lixdii bilood ee dambe ee 2010ka uguna wacan tahay waxyaalo isbiirsaday sida xaaladda sugnaanta cuntada ee kasii daraysa, la'aanshaha biyo nadiif ah oo kordhiyay cudurrada shubanka iyo hoos u dhaca helitaanka caanaha. Tirada caruurta nafaqo la'aanta ah ayaa korortay in ku dhaw 7 boqolkii waxaana hadda lagu qiyaasaa **241,000 caruur oo ka yar d'ada 5 sano ay nafaqo la'aan ba'ani hayso, kuwaasoo 57,000 ka mid ahi ay si daran u nafaqo darraysan yihiin**. Gobollada koonfureed ayay si xuni u saamaysay, oo ku noolyihiin 75 boqolkiiba (ama 181,000) dhammaan intii lagu arkay nafaqodarrida ba'an iyo 80 boqolkiiba dhammaan carrurtii nafaqo la'aanta daran lagu arkay.

**Dalag Bi'id Ballaaran ayaa Saamaysay Beeralayda Koonfurta**

Dadka beer-xoolo dhaqatada iyo kuwa diisha webi ee koonfurta Soomaaliya, oo sida badan ku tiirsan roobka si ay ugu noolaadan beerashada, ay u dhibtooday hoos u dhaca weyn ku yimid waxsoosaarka firida ee Deyrta 2010, oo ah shan-meeloodoo-meel waxsoosaarka Deyrta caadiga ah. Waxay deedna keentay in tirada dadka dhibban ee Koonfurta ay kororto ugu badnaan 70 boqolkiiba beer-xoolo dhaqatada iyo kuwa diisha webi ku dhaqan oo hadda gaaraya 440,000 oo qof. Annagoo tixgalinayna tani waa xilli beereedkii 2aad ee sanadka, meesha xilligii Guga ee lasoo dhaafay dalag aad u wanaagsan la goostay, sahayda firida ayaa weli laga helayaa meelo badan. Sidaa daraadeed, kororka tirada dadka dhiban ayaa dhexdhexaad ah marka loo eego dalagga baaqday xilligan. Habnololeedka beer-xoolo dhaqatada Koonfurta ayay aad saamaysay marka loo eego dadyawga reer webiga, maadaama beer-xoolo dhaqatadu ay la kulmeen waxsoosaarkii beeraha oo dhammaan baaqday. sidaad daraadeed, 76 boqolkiiba beeralayda ay saamaysay ayaa ka yimid habnololeedka beer-xoolo dhaqatada. Haseyeeshee, habnololeedka diil-webi ee Hiiraan ayaa leh qaybta ugu ballaaran ee dadka dhibban (89% dadk habnololeedkan) uguna wacantahay 8 xilli oo isku xiga oo dalaggu si aad ah u baaqday.

**Dhibaatada Sugnaanta Cuntada Reer-magaalka oo Badatay**

Goosashada dalagga firida ee baaqday iyo dareenka ganacsatada Koonfurta oo sababay in sicirka firida dalka uu aad u kordho, ayaa si muhiim ah u saameeyay qoysaska reer magaalka oo iyagu suuqa ku tiirsan ayaa sababay in ay si wax ku ool ah oo 52 boqolkiiba dadka reer magaalka ah ee dhibban ay kordhaan tan iyo Gugii 2010 dabadii. Iminka, 475,000 oo saboolka reer-magaalka ah ayaa dhibban, oo 38 boqolkiiba ay ku sugan yihiin ***Gurmad Baniiaadminimo***. Waxaa helista cuntada ee dadka ay dhibaatadau saamaysay xannibay sicirka cunnada ee sarreeya, ku hardanka shaqo helidda oo iskaba yarayd iyo taageerada bulshada ee ka dhaxeeya dadka reer miyiga ee abaartu saamaysay iyo barakacayaasha oo korortay iyo weliba taageeradii samafalka oon la helin. Sicirka nolosha ee sii kordhaya ayaa guurinaya awoodda wax-iibsiga ee dadyaw badan oo saboolka reer-magaalka Iyo barakacayaasha xannibaysana fursad u heliddoodii cuntada, gaar ahaan Koonfurta, Bartamaha iyo weliba qaybo ka mid ah Waqooyiga. Sikastaba ha ahaatee, dhulka Shilinka Soomaalilaandka (ShSl) lagag adeegto ee Waqooyi-galbeed ayay xaaladdu kasoo raysay, qayb ahaanna ugu wacantahay dalag xad dhaaf ah oo la goostay Gu/Karantii ee Bishii 10aad, 2010, oo sababay in si aad ah uu sicirka firida dalka hoos ugu dhaco.

FSNAU - Somalia
United Nations Somalia,
Ngecha Road Campus
Box 1230, Village Market,
Nairobi, Kenya
Tel: +254-20-4000500
Cell: +254-722-202146
/ 733-616881
Fax: +254-20-4000555
Email: info@fsnau.org
Website: www.fsnau.org

**Abaar ayaa Saamaysay Habnololeedyada Xoolo-dhaqatada**

Dhulka xoolo-dhaqatada ee dalka intiisa badan ayay si ba'an u saamaysay dhibaato biyood uguna wacan tahay inteeda badan roobabkii Deyrta ee la waayay. Dadka reer miyiga ee dhibaataysan ee meelaha xoolo-dhaqatada ayaa iminka lagu qiyaasay 435,000. Habnololeedyada xoolo-dhaqatada waxa inta badan cabsi geliyay biyo li'ida, markaan eegno baahida biyo iyo baad, waa kuwa l'oda iyo idaha leh, oo awood xadidan u leh inay u hayaamaan meelo fog-fog. Waxaa xoolo-dhaqatadani intoda abadani laga helaa gobollada Bartamaha (Deexda) iyo Juba. Habnololeedyada ay xaaladdooda ugu liidato waa Deexda (gobollada Bartamaha, Shabeellada Dhexe, iyo Nugaal), Digir Tabcatada (gobollada Bartamaha iyo Shabeellada Dhexe) iyo weliba Geel-dhaqatada koonfureed ee gobolka Hiiraan, halkaasoo dhimasho xoolaad (l'o, riyo iyo ido) lagusoo sheegay uguna wacantahay biyo iyo baad yari ba'an oo lagu soo warbixiyay.

**Tirada Dadka Gudaha Dalka ku Barakcasan oo Kordhay**

Tirada barakacayaasha ee isaga tagaya guryahoodii iyo habnololeedkoodii si uga baxsadaan iska-horimaadyada aan xukunnayn ee ka jirta qaybo ka mid ah koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ayaa korortay oo gaartay ilaa 1.46 malyuun oo qof (4%) badhkii labaad ee 2010. In ku dhow nus tirada barakacayaasha ayaa ku dhex milmay bulshada reer-miyiga iyo reer-magaalka lana qaybsaday xaaladda ba'an ee haysata dadka ay abaaruhu aafeeyeen. Barakacayaasha ay FSNAU u tixgelisay inay ka baxsanyihiin reer-miyiga ayaa iminka lagu qiyaasay 910,000 qof waxayna yihiin hal koox-dadeedka 2aad ee ugu ballaaran ee dhibban. Barakacayaashani syay si isku mid ahi u saamaysay sicirka cuntada ee aad sare ugu kacay, xadidnaanta taageerada baniaadminimo, gaar ahaan kuwa Koonfurta iyo Bartamaha ee heerarka nafaqo darridooda ay ka sarreyso 20 boqolkiiba.

**Xaaladda Nafaqo ee Koonfurta oo Argagax leh**

Qiyaasta 241,000 ee caruurta ay nafaqo-darrida ba'ani hayso, ayaa 57,000 ka mid ahi ku sugan xaalad aad u daran, oo ka tarjumaysa qiyaastii 7 boqolkiiba inay korortay tiradii, xaaladda nafaqo darri ee Soomaaliya ayaa ka sii dartay lixdii biloodee dambe ee sanadkii 2010. Waxay iminka Koonfurta ku jirta wajiga ***B'anaanta ilaa Aad u B'anaanta***, waxayna tahay halka ugu liidata, waxayna haysaa 75 boqolkiiba (ama 181,000) dhammaan tirada nafaqo la'aanta ba'ani hayso iyo 80 boqolkiiba dhammaan carruurta nafaqo la'aanta darani hayso. Marka lagu saleeyo dhexdhexaadka heerarka nafaqo l'aanta ba'ani ee Koonfurta, **afartii carruur ahba mid ayay nafaqo la'aan ba'ani haysaa,** iyo **labaatan-iyo-saddexdiiba mid ayay nafaqo la'aan darani haysaa.** Xaaladda nafaqo ee koonfurta ee weli ku sugan midda ugu liidata adduunka iyo mucaawanada banii'aadminimo ee sii guraysa iyo helidda adeegga asaasiga ee sii yaraanaysa, sida caafimaadka iyo biyo nadiif ah, ayaa aad u hor istaagaya awoodda korriimo ee caruurta in ay aad u hormarto. Hase ahaatee, gobollada dhexe iyo waqooyiga, waxaa ka jira horumar muddo gaaban ah oo roobabkii Gugii 2010 (Bilihii 4aad - 6aad) iyo helidda gurmadka banii'aadminimo oo fiicnaa awigeed.

**Shaxda 1: Kala Dheehidda Baahsan ee Wejiyada Sugnaanta Cunnada ee Soomaaliya, Tirada Dadka, Bilaha 1aad - 6aad ee 2011**


| Gobolka | Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005 | Isku Darka Tirada Dadka Magaalooyinka UNDP 20051 | Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee UNDP 2005 1 | Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) | Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) ee Haysata Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah 2 | Dadka Magaalooyinka ee ku jira Gurmad Bina-aadamnimo (GB)2 | Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee ee ku jira Gurmad Bina'aadamnimo (GB)2 | Isku Darka Dadka ku jira XCHAX iyo GB oo ah % Tirada Guud ee Dadweynaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **North** | | | | | | | | |
| Awdal | 305,455 | 110,942 | 194,513 | 0 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Woqooyi Galbeed | 700,345 | 490,432 | 209,913 | 0 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Togdheer | 402,295 | 123,402 | 278,893 | 0 | 15,000 | 0 | 0 | 4 |
| Sanaag | 270,367 | 56,079 | 214,288 | 20,000 | 25,000 | 15,000 | 15,000 | 28 |
| Sool | 150,277 | 39,134 | 111,143 | 20,000 | 10,000 | 0 | 0 | 20 |
| Bari[3] | 367,638 | 179,633 | 202,737 | 60,000 | 40,000 | 0 | 5,000 | 29 |
| Nugaal | 145,341 | 54,749 | 75,860 | 25,000 | 15,000 | 0 | 10,000 | 34 |
| **Sub-total** | **2,341,718** | **1,054,371** | **1,287,347** | **125,000** | **105,000** | **15,000** | **30,000** | **12** |
| **Central** | | | | | | | | |
| Mudug | 350,099 | 80,997 | 131,455 | 30,000 | 90,000 | 0 | 50,000 | 49 |
| Galgaduud | 330,057 | 58,977 | 271,080 | 0 | 100,000 | 20,000 | 60,000 | 55 |
| **Sub-total** | **680,156** | **139,974** | **402,535** | **30,000** | **190,000** | **20,000** | **110,000** | 51 |
| **South** | | | | | | | | |
| Hiraan | 329,811 | 69,113 | 260,698 | 5,000 | 65,000 | 30,000 | 130,000 | 70 |
| Shabelle Dhexe (Middle) | 514,901 | 95,831 | 419,070 | 20,000 | 70,000 | 0 | 15,000 | 20 |
| Shabelle Hoose (Lower) | 850,651 | 172,714 | 677,937 | 15,000 | 10,000 | 55,000 | 0 | 9 |
| Bakool | 310,627 | 61,438 | 249,189 | 5,000 | 90,000 | 25,000 | 5,000 | 40 |
| Bay | 620,562 | 126,813 | 493,749 | 45,000 | 10,000 | 5,000 | 0 | 10 |
| Gedo | 328,378 | 81,302 | 247,076 | 20,000 | 45,000 | 5,000 | 5,000 | 23 |
| Juba Dhexe (Middle) | 238,877 | 54,739 | 184,138 | 0 | 30,000 | 25,000 | 30,000 | 36 |
| Juba Hoose (Lower) | 385,790 | 124,682 | 261,108 | 30,000 | 35,000 | 0 | 30,000 | 25 |
| **Sub-total** | **3,579,597** | **786,632** | **2,792,965** | **140,000** | **355,000** | **145,000** | **215,000** | **24** |
| **Banadir** | **901,183** | **901,183** | **-** | - | - | - | - | 0 |
| **Grand Total** | **7,502,654** | **2,882,160** | **4,482,847** | **295,000** | **650,000** | **180,000** | **355,000** | **20** |

| Tirada dadka la qiimeeyey iyo kuwa ay suurtagal tahay inay galay XCHAX & GB | Number affected | % of Total population | Distribution of populations in crisis |
|---|---|---|---|
| Dadka Magaalooyinka ee la Qiimeeyey ee ku jira XCHAX & GB | **475,000** | **6** | **20%** |
| Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee la Qiimeeyey ee ku jira XCHAX & GB | **1,005,000** | **13** | **42%** |
| Qiyaasta tirada barakayaasha (UNHCR) | **1,465,000** | **20** | **-** |
| Tirada barakacayaasha oo dib loo jaangooyay, si looga fogaado labo-jeer tirin qiyaasaha kala dheehidda xaaladaha cunno sugnaanta (IPC) ee reer miyiga | **910,000** | **12** | **38%** |
| Qiyaasta tirada dadka tabaalaysan ee miyiga, magaalooyinka iyo barakacyaasha | **2,390,0000 - loo celceliyay 2.4 Million** | **32** | **100.0%** |

Notes:

1. Laga soo Xigtay: Qiyaasaha Tirada Dadka heer Gobol/Degmo, UNDP Soomaaliya, 1da Bisha 8aad. FSNAU iskuma jaangoyso tirada maadaama ay yihiin tirooyin la isku raacsan yahay oo ay soo saartay UNDP
2. Tirada la qiyaasay waxa loo celceliyay tirada 5 kun ee ugu dhow, oo lagu saleeyey tirada dadka deggan ayadoo aan lagu dareynin (eegeyn) tirada barakacayaasha ee haatan iyo kuwa bara kici doonaba, balse waxa ku jira tirada dadka dhibaataysan ee qarka u saaran inay u gudbaan xaaladaha (XCXDH iyo GB) ayadoo loogu daray ujeeddooyin qorshayn
3. Dangorayo kama mid aha gobolka Bari sabatuna tahay ayadoon hore ugu jirin tirada gobolka intii ka horreysey qiyaasihii WHO/UNDP ee 2005
4. Laga soo xigtay UN-OCHA/UNHCR: Tirada cusub ee barakacayaasha oo dib loo qiyaasay bisha 9aad, 2010 taasoo loo celceliyay 5-ta kun oo ugu dhow. Tirada barakacayaasha ayaa ku salaysan xogta la socodka dhaqdhaqaaqa dadka, taasoon loogu talo gelin in lagu helo wadarta guud ee barakayacayaasha muddada dheer
5. Falaqaynta ayaa muujinyasa in 60% barakacayaasha ay ka soo jeedaan Muqdisho. Si looga fogaado laba jeer tirin ayaa barakacayaasha ka yimi Muqdisho loo tixgeliyay in lagu xuso falanqaynta kala duwanaanshaha heerarka sugnaanta cunto. FSNAu ma samayso sahamo la xiriira falanqaynta heerarka sugnaanta cunto ee GB ama XCXDH
6. Tirada dhabta ah waa 2,390,000 taasoo loo celceliyay 2,400,000
7. Boqolkiiba tirada dadka Soomaaliya ayaa laga qiyaasay tirade guud ee 7,502,654 (UNDP/WHO 2005)

**Khariiradda 1: Kala Dheehidda Baahsan ee Wejiyada Sugnaanta Cunnada ee Soomaaliya, Tirada Dadka, Bilaha 1aad - 6aad ee 2011**




# WARBIXINTA QAYBAHA


cimilada

## CIMILADA

**Khariiradda 2: Boqolkiiba Roobabka Caadiga, Bisha 10aad – 12aad ee 2010**




**Khariiradda 3: Bisha 12aad Ka-duwanaanshaha Tusaha Doogganaanta Muddada Fog (LTM)**




Waxtarkii roobabkii xilliga Deyrta 2010 (Bilihii 10aa - 12aad) ayaa aad u xumaaa dalka intiisa badan uguna wacnayd dhacdadii La Niña. Isbarbardhigga xogta roobabka ee *Deyta* 2010ka iyo celceliska muddada dheer (CMDh) ee isla xilligaa ayaa muujinaya in dalka intiisa badan ay heleen 0-20 boqolkiiba heerarka roobabka caadiga. Roobabkii xilliga way ku kala duwanaayeen muddada iyo baaxaddaba ee dalka oo dhami muddadii lagu jiray Bishii 10aad. Hase yeeshee, Bilihii 11aad iyo 12aad, roob la'aan ayaa daashatay Soomaaliya oo dhami. Bishii 10aad, meelo ka mid ah dhulka xoolo-dhaqatada Waqooyi, sida aagga Golis-Gubanka, gobollada Awdal iyo W. Galbeed iyo qaybo ka mid Togdheer ayaa helay roobab u dhaxeeya fudeyd iyo dhexdhexaad (1 ilaa 50mm) oo uga dambeeyay roobabkii wanaagsanaa ee *Karanta* ee Bishii 9aad. Sidoo kale xoogaa roob *Deyreed* ah ayaa Bishii 10aad ka da'ay meelo ka mid ah gobollada Bartamaha iyo Waqooyi-bari ooy ka mid yihiin Hawdka Burtinle, Galdogob iyo Galkacyo iyo Goliska degmada Calula. Si kastaba ha ahaatee, waxtarka guud ee dhanka awoodda iyo tirada guudba aad buu u xumaa Bartamaha iyo Waqooyi-bari. Xagga koonfurta, roobabka waxay ahaayeen goosgoos aadna way uga hooseeyeen caadigii habnololeedyada intooda badan Bishii 10aad, halka meelo ka mid ah Afmadow iyo Badhaadhe ay heleen roobab shuux ah dabayaaqadii Bishii 11aad (Khariidada 2).

Waxaa dayax-gacmeedka lagasoo minguuriyay Tusaha Kala-duwanaanshaha Daaqa la Caadaystay (TKDC) ee tobankii dambe ee Bishii 12aad oo muujinaya in daaqu aad u liito marka la barbardhigo Celceliska Mudada Dheer (CMD) (1999-2010) gaar ahaan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya (Khariidada 3). Khaasatan, meelo ka mid ah xoolo-dhaqatada Sool, Sanaag, koonfur-bari Togdheer iyo gobollada Dhexe. waxaase taa ka duwan, sawirka dayax-gacmeedka, oo waafaqay xogtii dhulka laga keenay, oo muujiyay in xaaladda daaqsin ay ka wanaagsan tahay qaybo ka mid ah Waqooyi-galbeed iyo meelo yar oo ka mid ah gobollada Waqooyi-bari (degmada Caluula). Hoos u dhac degdeg ah ayaa la filayaa in daaqa uu ku dhaco xilliga Jiilaalka.

## COLAADDA SOKEEYE

Waxay colaadda sokeeye noqotaty mid ka mid ah waxyaalaha ugu muhiimsan ee wax ka baddala xaaladda sugnaanta cuntada Soomaaliya. Wuxuu dalka u ba'ayaa iska-horimaadyada siyaasadeed ee soo jiray tan iyo horraantii 90shamedyadii, oo si joogta ah usoo laba kacaya ugu horreyntiina saameeya habnololeedyada reer-magaalka. Mudisho, Hiiran (Beledweyne) iyo Galgaduud (Dhusamareeb) ayaa weli ah xudunta Iska -horimaadyada ay siyaasddu haraysay, dagaallo marmar ah ayaa ka dhaca Waqooyiga Bakool, oo deedna u gudbay qaybo ka mid ah gobolka Gedo (magaalada Beledxaawo) laga billaabo bartamihii Bishii 10aad 2010.

Waxaa sii dheer, qabiillada isku laynaya daaqa iyo biyaha ayaa sii adkaysanaya qaybo ka mid ah Bartamaha ka dib markii ay abaari ka aloosantay (sida Godad and Xeraale) iyo waqooyiga (gaar ahaan Kalshaale) oo ka xannibtay dadkii xoolo-dhaqatada ahaa ee aaggaasi ooy abaartu saamaysay inay isticmaalaan daaqii iyo biyihii (Kharidada 4).


Dhulka Deexda ee Bartamaha iyo Waqooyi-bari, waxaa si joogta ah u jooga burcad badeeddii oo si aad ah u horistaagay dhaqaalihii kalluumaysiga, dhaawacyna helitaankii cuntada ee bulshooyinka deexda.

Waxaa muhiim ah in la ogaado, in colaadda Soomaaliya ay siyaale kala duwan oo toos ah iyo si-aan toos ahaynba u saameeysay habnololeedyada Soomalida. Waa sida e, dad ku dhinta iyo hanti ku baab'ada, waxaa si ballaaran u socda barakac dadeed oo ka jira xarumaha magaalo ay colaadd ka aloosmi ogtahay ee dalka Iyo dibaddiisaba.

Hayadda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga (UNHCR) ee Soomaaliya ayaa ku qiyaastay In ku dhow 24,000 qof ay bishiiba brakacayeen intii u dhexeysay Bilihii 7aad iyo 12aad, 2010. in ku dhow 85 boqolkiiba ee barakacani ayaa sababay iskahorimaadyada Muqdisho iyo meelaha kale ee Koonfurta ka mid ah. Iminka, in ku dhow 1.46 malyuun oo dad ah ku barakacsan dalka gudihiisa.

Waxyaalaha kale ee ay colaaddu keentay ayaa muujiyay dhaqaalaha jahawareerku ku dhacay; xannibanka suuqyada iyo hawlihii ganacsiga, gaarahaan Bartamaha, Hiiraan (Beledweyne) iyo Muqdisho; waxaa kaloo soo koobmay heliddii samafalka iyo taageeradii la siin lahaa dadka baahan ee ku nool qaybo ka mid ah koonfurta iyo bartamaha dalka.

**Khariiradda 4: Natiijooyinka Nabadgelyo Xumada Soomaaliya, Bisha 12aad, 2010**




Source: FSNAU, January, 2010

## BEERAHA

*Deyr* waa xilli beereedka labaad (muddo-roobeed gaaban), waxayna biirisaa 30 boqolkiiba wadarta firida soo baxda sanadkii, halka waxsoosaarka intiisa badani uu ka yimaado xilliga Guga. Haseyeeshee, maadaama roobab teelteel ah oo liita Deyrtii laga la kulmay, waxaa si aad ah hoos u dhacay waxsoosaarkii firida ee koonfurta Soomaaliya, oo noqotay heerkii ugu hooseyay tan iyo 1995. Waxaa iminka waxsoosaarka firida lagu qiyaasay 21,000MT (15,000MT waa gallay, 3,000MT waa haruur iyo 3,000MT oo ah bariis) oo muujinaysa in ku dhow 80 boqolkiiba uu hoos u dhacay marka la barbardhogo Celceliska *Deyr* Colaadda Dabadeed (CDCD 1995-2009), iyo weliba celiska 5-sano *Deyrahood* (2005-2009) (Shaxda 2).

**Shaxda 2: Qiyaasaha Soo-saarka Firileyda ee Koonfurta Soomaaliya**


| Regions | *Deyr* 2010 Production in MT | | | *Deyr* 2010 as % of *Deyr* 2009 | *Deyr* 2010 as % of *Deyr* PWA (1995-2009) | *Deyr* 2010 as % of 5 year average (2005-2009) |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | Maize | Sorghum | Total Cereal | | | |
| Bakool | 100 | 100 | 200 | 8% | 10% | 7% |
| Bay | 0 | 2,700 | 2,700 | 4% | 9% | 8% |
| Gedo | 1,200 | 0 | 1,200 | 26% | 21% | 17% |
| Hiran | 300 | 200 | 500 | 24% | 7% | 9% |
| Juba Dhexe (Middle) | 200 | 0 | 200 | 2% | 4% | 4% |
| Juba Hoose (Lower) | 100 | 0 | 100 | 7% | 9% | 24% |
| Shabelle Dhexe (Middle) | 5,300 | 0 | 5,300 | 51% | 46% | 73% |
| Shabelle Hoose (Lower) | 7,700 | 0 | 7,700 | 34% | 23% | 34% |
| TOTAL | 14,900 | 3,000 | 17,900 | 14% | 19% | 21% |

Waxaa firida inteeda badani *Deyrtan* 2010/11 lagasoo goostay habnololeedyada diil-webi iyo dhulka waraabka, halka (95%) dhuka beer-xoolodhaqatada gaar ahaan kuwa haruurka roob-waraabka tabcada ay la kulmeen waxsoosaar la'aan. Gallayda oo inteeda badani lagasoo goostay dhulka webiyada, ayaa iyana waxyeeleyeen roobabkii xumaaday, heerka webiga oo hoos u dhacay, maamulka webiga iyo habka waraabka oo liita. Gobollada Shabeelle, oo iminka qiyaastii 16,000MT oo firi ah laga soo goostay, ayaa 76 boqolkiiba qayb u helay wadarta guud ee waxsoosaarkii *Deyrta* 2010 ee koonfurta Soomaaliya. Waxsoosaarka ayaa si aad ah uga hooseeya CCD, gobollada Shabeellaha Dhexe (46% CCD), Shabellaha Hoose (23% CCD) iyo weliba Gedo (21% CCD). Waxaa taa ka duwan, dalag bi'id ballaaran (hoos u dhac 90-95%) ayaa lagasoo xusay gobollada Jubada Dhexe (4% CCD), Hiiran (7% CCD), Jubada Hoose (9% CCD), Baay (9% CCD) iyo Bakool (10% CCD). Waxsoosaarka dalagga iibka (basal, sisin, bariis, digir iyo basbaas) ayaa sidoo kale u waxyeeloobay, oo iminka lagu qiyaasay waxsoosaar gaaraya 15,700MT (ooy ku jiraan xilli-dambeedka sisinta iyo digirta) oo 64 boqoliiba ka hoos martay marka la barbardhigo *Deyrtii* 2009/10. Waxaa taa ka duwan, firida la goostay (Bilihii 10aad-11aad 2010) ayaa aad u wanaagsanaa dhulka beer-xoolodhaqatada gobollada Awdal, W. Galbeed iyo Togdheer, waxaana ugu wacnaa waxtarkii roobabka *Gu/Karanta* 2010 oo aad u wacnaa dhulka beer-xoolodhaqatada gobollada Awdal, W. Galbeed iyo Togdheer, gargaar beereed (Saacado cagaf oo la siiyay, abuur iwm) ooy hayado kala duwan

ay bixiyeen iyo dhulka la beertay oo kordhay. Firida gobolladan laga goostay ayaa lagu qiyaasay halkii ugu badnayd muddo 10 sano ah, una dhiganta 72,000MT (402% CCD).

Waxsoosaarkii *Deyrta* 2010 ee ba'ay ka sokow, waxsoosaarka sanadlaha ee firida, (gallayda iyo haruurka) ayaa lagu qiyaasay 225,000MT (ooyna ku jirin gallayda xilli-dambeedka *Deyrta*) koonfurta Soomaaliya ayaa weli haysta 94 boqolkiiba sanadlaha CCD, waxaana ka dambeeyay waxsoosaarkii faraha badnaa ee *Guga* (137% *Gu* CCD) ee 2010 (eeg Technical Series Report No VI.33, Sep. 27, 2010). Waxaa intaa dheer, falanqaynta helidda firida ee FSNAU ayaa muujinaya heerar kala duwan oo kaydka firida la haysto gobollada koonfureed marka laga soo billaabo wixii la goostay *Gu* 2010, *Gu 2010* xilli-dambeedkiisii iyo *Deyr* 2010. Kaydka gallayda ee dhulka wabiyada Shabeelle ayaa lagu qiyaasay lanay ku filan tahay 10 – 12 bilood lagana yaabo inay ka badan tahay Shabellaha Hoose, sida uu muujinayso falanqaynta. Kayd gallay ayay iyana haystaan Jubada Dhexe (5 bilood) iyo habnololeedka diil-webi ee Gedo (3 bilood), halka kaydka haruurka ee dhulka beer-xoolodhaqatada lagu qiyaasay inay ku dhammaan bilooyin Baay (5 bilood) iyo Jubada Dhexe (3bilood). haseyeeshee, ma jiraan wax firi ahoo kayd ah ooy heystaan gobollada kale, uguna wacan tahay waxsoosaarka firida oo hoosaysay xilligan iyo kii ka horreeyayba.


**Jaantuska 1: Isbeddelada Qiimaha Firileyda (SoSh/SlSh) ee Heer Gobol**




## Sicirka Firida Dalka iyo Nidaamka Ganacsiga

Waxsoosaarka firida ee aad u hooseeya ee *Deyrta* 2010 ayaa sababay in si aad ah uu u kaco sicirka firida dalka (Haruur iyo Gallay) koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya (Tusaha 1). Waxa ugu badan ee sicirka kiciyay waa kordhinta firida ay kaydsanayaan beerallayda iyo ganacsatada ka dib markii waxsoosaarkii *Deyrta* uu xumaaday iyo hubid la'aanta siday noqon doonto xilli beereedka xiga (*Guga* 2011). Celcelis ahaan, sicirka haruurka ayaa kordhay 80 boqolkiiba gobollada Harrurka Tabcada, halka sicirka gallayda uu kacay 57 boqolkiiba gobollada gallayda soo saara ee Shabelle iyo Juba marka la barbardhigo heerarkii Bishii 12aad 2009. Sicir kororkan aadka ahi ayaa laga helay gobollada dhexe (67%), oo inta badan ka hela sahayda haruurka cas iyo gallayda cadba koonfurta Soomaaliya. Waxaa taa ka duwan, sicirka haruurka cad ayaa hoos u dhacay suuqyada Waqooyi-galbeed tan Iyo Bishii 12aad 2009 (25-41%) waana halkii ugu hooseysay tan iyo sanadkii sici bararka 2008, sababta Soomaaliya una tahay waxsoosaarkii faraha badnaa ee *Gu/Karantii* 2010. Sicirka firida laga soosaaro dalka ee koonfurta Soomaaliya ayay u badantahay inay sare isu sii shareerto inta laga gaarayo tacabgoosiga inasoo xiga, maadaama uu kaydku sii yaraanayo, sia aanu horeyba ugu soo sheegnay in Bisha 1aad uu sicirka firida uu kordhi doono.

**Jaantuska 2: Xaddiga Isdhaafsi ee Dakhliga Shaqo-maalmeed iyo Gallayda ee Shabeellooyinka iyo Jubbooyinka**




Hawl beereedka hoos u dhacay, dalagii *Deyrta* ee ba'ay awigeed, faa'iido darro ayay ku noqotay qoysaska saboolka ah ee intooda badani ku nool habnololeedyada dalaga soosaara ee fursadaha hawl-beereedka ku dhaqnaa, yaraysayna mushqaayaddii. Sidaa daraadeed, awoodda wax iibsiga ee qoysaska saboolka ah ayay si ba'ani u taabatay.

Nidaamka kala Ganacsiga (NkG) ee u dhexeeya shaqada iyo firida (Gallay amd Haruur) ee Bishii 12aad 2010 ayay hoos udhacday Shabelle (50%), Juba (60%), Haruur Tabcatada (ilaa 80%) Iyo gobollada dhexe (67%) marka la barbardhigo Bishii 12aad 2009. Si kastaba ha ahaatee, hoos u dhicii ugu badnaa oo 80 boqolkiiba oo isla waqtigaa ah ayaa lagu arkay gobollada dhexe. Waxaa lidkeeda ah, NkG ee Waqooyigalbeed oo muujinaya isbeddel (20 – 60%) intii u dhexeysay Bishii 12aad 2009 iyo Bishii 12aad 2010, uguna wacan tahay hoos u dhaca sicirka haruurka cad (Tusaha 2). FSNAU waxay sii wadi doontaa inay kormeerto helidda shaqooyinka iyo sicirka firida bilaha soo socda.

## XOOLAHA


### Xaaladda Daaqa iyo Biyaha

Xaaladda daaqa Iyo biyaha ayaa aad uga sii daraysa dhulka intiisa badan ee Soomaaliya ka dib markii ay xumaadeen waxtarkii roobabkii *Deyrta*. Ka dib markii ay ilihii biyaha (berkadaha, durdurrada, waro wadareedyada) billaabeen inay qalalaaan markii ay dhulka xoolodhaqatada ee dalka intiisa badani waayeen roobabkii xilliga, ayaa waxa goor hore billaabmay biyo dhaamis laga soo billaabo Bishii 11aad, taasoo keentay in si wax ku ool ah u kacaan sicirka biyaha. Biyo ama/iyo baad dhexdhexaad ah waxaa lagu arki karaa oo qudha dhulkii helay roobab dhexdhexaad ah sida dhul daaqsimeedka Hawdka intiisa badan, xoolodhaqatada Golis/Guban, Habnololeedka beer-xoolodhaqatada Awdal, W. Galbeed, iyo Togdheer ee Waqooyi-galbeed, iyo weliba dhul goosgoos ah oo ka mid ah gobollada Baay iyo Shabeelada Hoose (Khariidada 5).

Baad iyo biyo yarida ka jirta habnololeedyada intooda badan ee xoololdhaqatada Iyo beer-xolloldhaqatada ee dalka ayaa kallifay in xooluhu hayaamaan. Kooxaha hantiilayaasha iyo qaybta sare ee kooxda dhexe ee Bartamaha, Hiiraan iyo Waqooyiga ayaa u guuray dhulka lama galaayga ah ee cawsleyda ah kana fog ilaha biyaha waxayna ku tiirsan yihiin biyo dhaamiska iyaga iyo xoolahoodaba. Qaar ka mid ah xoolodhaqatada waxay u hayaameen gobolka Soomaalida

ee Itoobiya. Koonfurta, xoololdhaqatada waxay badankoodu u hayaameen dhulka webiyada ee dooxad Juba iyo Shabeelle. Walow ay xooluhu khatar ugu jiraan in cudurka gendiga uu ku dhaco (waa cudur uu gudbiyo diqsiga gendiga oo caadi ahaan jooga gosha webiga). Maadaama biyaha iyo baadkaba ay gabaabsi noqdeen, xoolodhaqatada qaarkood ayaa lagu soo warramay inay iibsadeen balkii taagnaa si ay xooluhu u daajistaan, halka kuwo kale ay kireysanayaan beeraha si ay cawskooda u siistaan xoolaha.

**Khariiradda 5: Xaaladaha Baad, Biyo iyo Guurguurka Xoolaha ee Soomaaliya, Bisha 12aad, 2010**




Source: FSNAU, December, 2010


**Xaaladda Jidhka Xoolaha iyo Tarankooda**
Gobollada W. Galbeed iyo Awdal iyo beer-xoolodhaqatada Togdheer ee Waqooyigalbeed, xaaladda naaxsanaanta xoolaha waa dhexdhexaad uguna wacan tahay daaqa dhexdhexaadka ah ka dib markii ay heleen roobab wanaagsan xilligii *Gu/Karanta* 2010 iyo roobab dhexdhexaad *Deyrtii* Bishii 10aad iyo horraantii Bishii 11ad. Sikastaba ha ahaatee, xooluhu way sii weydoobayaan qaybaha kale ee Waqooyigalbeed (Togdheer, Sool iyo Sanaag), iyo weliba Waqooyibari, Bartamaha, Hiiraan Iyo gobollada kale ee koonfurta, khaasatan lo'da iyo idaha, madaama biyaha iyo baadkaba ay aad yaraadeen iyo fursadihii u guurista gobollada deriska ah oo aad u yaraaday maadaama biyo iyo baad yarida ay isaga mid yihiin. Sidaa daraadeed, dhasha inteeda badan iyo irmaankaba ee dhulkaasi ayaa adag inay badbaadaan muddada dheer ee xilliga jilaalka. Geelu ma weydsana dhulka intiisa badan, marka laga reebo Hiiraan iyo Bartamaha halkaasoo astaamihii weydsanaanta lagu arkay. Halka ugu xumi waa habnololeedyada Deexda (gobollada Bartamaha, Shabeellada Dhexe iyo Nugaal), Digir Tabcatada (gobollada Bartamaha iyo Shabeellada Dhexe) sidoo kale geel dhaqatada koonfureed ee gobolka Hiran, halkaasoo lagu soo warbixiyay dhimasho xoolaad (sida lo'da, idaha iyo riyaha) ka dib markii biyihii iyo baadkiiba la waayay.

Dhibaatada abaarta ayaa keentay in heerka rimaygu noqdo mid u dhexeeya hoos iyo eber duunyo xoolaad oo idil *Deyrta* 2010/11. Dhalmada geela iyo lo'da joogta dhulka ay abaartu saamaysay ayaa mid hoose ilaa eber ah maadaama rimaygodu ahaa *Gugii* 2010ka. Waxaase ka duwan gobollada Juba, Shabelle, Gedo iyo Baay, halkaasoo heerka dhalmada lo'da ay dhexdhexaad ahayd *Deyrtii* 2010/11. hase ahaatee, heerka dhalmada riyaha iyo idaha ayaa ahaa dhexdhexaad ilaa heer sareeya dhammaan habnololeedyada xoolodhaqatada iyo beer-xoolodhaqatada. Dhalmada lo'da iyo geela ee yaraatay awigeed, caanihii baa yaraaday inta badan gobollada dalka. waxaase ka duwan, gobollada Juba, Baay, Awdal iyo W. Galbeed oo geelu dhiiqo caano dhexdhexaad ah ka dib markii uu geelu si dhexdhexaad ah uu u dhalay xilligii *Guga* 2010. Nidaamka lagu falanqeeyo Isbedbedelka taranka xoolaha ee FSNAU *Deyrtii* 2010/11 ayaa muujinaya isbeddel hoos u dhac ah ka jiro tirada idaha, riyaha iyo lo'da tan iyo xilligii *Guga* 2010, gaareenna tiro ka hooseysa ama laba siman heerarka gundhigga dhammaan habnololeedyada xoololdhaqatada iyo beer-xoolodhaqatada dalka. Hoos udhaca ugu weyn ee tirada riyaha iyo idaha ayaa lagu arkay gobollada ay abaartu saamaysay ee Hiraan, Nugaal iyo Bartamaha (Digir Tabcatada iyo Deexda), ka dib markii ay la kulmeen xilliyo isdaba joog ah oo abaar ah. Tirada geela ayaa iyana in yar hoos u dhacday xilligii *Deytra* marka laga reebo gobollada Waqooyigalbeed, Juba, Baay iyo Bakool.

**Sicirka Xoolaha iyo Awoodda Waxiibsiga Xoolodhaqatada**
Sicirka xooluhu waxay raaceen sidii caadiga u ahayd ee xilliga ooy hoos u dhacaan suuqyada intooda badan, marka lagasoo billaabo Bishii 6aad ilaa Bishii 9aad 2010, ka dibna sare ayay u kaceen xilligii Xajka ee Bilihii 10aad iyo 11aad. Sikastaba ha ahaatee, sicirka aad ayuu hoos ugu dhacay Bishii 12aad 2010 uguna wacnayd saamaynta abaarta iyo weliba baahidii dhoofka xoolaha Dawladaha Khaliijka oo soo yaraatayka dib markii xilligii xajka uu dhammaaday. Bishii 12aad 2010, sicirka riyaha dabaaxa hoos ayuu u dhacay kana hoos maray heerarkii sanadkii hore (Bishii 12aad 2009) ee suuqyada intooda badan. Hoos u dhaca ugu weyn ee sicirka riyaha dabaaxa (31%) waxaa laga soo qoray gobollada Juba ugun wacan tahay baahi suuq oo yaraatay, suuqyadii kale oo ku fogaatay, weliba saamaynta abaarta ee Isla xilligan. Sidoo kale, gobollada Juba waxay la kulmeen hoos u dhicii sugu weynaa ee sicirka lo'da (47%) marka la barbardhigo gobollada ee lo'da dhaqda ee koonfurta, halkaasoo sicirka lo'da ay 28-33 boqolkiiba ka hooseeyaan heerarkii Bishii 12aad 2009. Hoos u dhaca sicirka xoolaha iyo kororka sicirka firida (eeg Qaybta Beeraha) ayaa u horseeday hoos u dhaca weyn ku yimid Nidaamka kala Ganacsiga (NkG) ee u dhexeeya riyaha dabaaxa iyo firida (gallayda iyo

haruurka) ee gobollada sida weyn firida looga soosaaro ee Juba (57%), Haruur Tabcatada iyo Shabelle (44% kiiba) marka la barbardhigo heerarkii sandkii hore (Bishii 12aad 2009). Nidaamka kala Ganacsiga (NkG) (riyaha dabaaxa iyo bariiska) ayaa isna hoos u dhacay gobollada Waqooyibari (14%) iyo Bartamaha (5%) sababtuna tahay sicirka xoolaha ee hoos u dhacay iyo sicirka bariiska ee sare u kacay (Tusaha 3).

**Jaantuska 3: Xaddiga is dhaafsi ee Neefka Ariga iyo Firileyda ee Heer Gobol**




Mug-wadareedka xoolaha ka dhoofay Bosaso iyo Berbera sanadii 2010ka ayaa in badan ka sarreeya (45%) sanadii 2009, waxaana ugu wacan waxtarkii roobabkii *Guga* 2010 oo wanaagsanaa iyo fursad u heliddii suuqyada Sacuudi Careebiya oo wanaagsanaatay ka dib markii ay ka qaadeen xayiraaddii soo dejinta xoolaha Soomaalida (Bishii 10aad 2009). Wadarta xoolaha ka dhoofay labada dekadood sanadii 2010ka ayaa gaartay 4,214,873 neef[1], marka la isu geeyo geela, lo'da iyo ariga. Isla muddadaasi, Kawaanka

Xaaladda sugnaanta cuntada ee Waqooyiga ku adeegta SoSh ayaan isbeddelin (oo ku sugan xaaladda DCHB) tan iyo Bishii 6aad 2010, marka laga reebo magaalada Ceerigaabo (GB) iyo Burco (XSC), oo kharashka nolosha ay xoogaa yar sare u kacday (3-6%). Hase yeeshee, sugnaanta cuntada ee reer-magaalka ee Waqooyiga ku adeegta SlSh ayaa muujinaya degganaansho marka la barbar dhigay qaybaha kale ee dalka iyadoo sicir bararku hooseeyo, nidaamka kala ganacsiga yahay mid deggan ama kordhay uguna wacan tahay sicirka firida een isbeddelin ama hoss u dhacay (eeg Qaybta Beeraha), iskaalaysiga bulshada oo xooggan iyo xaladda nabadgelyada ee degganee ka jirta aaggaasi.


Xaaladda nafaqada ee saboolka reer-magaalka Soomaaliya aayaa muujinaysa xaalad la walaaco, sida ay daaha ka qaaday falanqayntii isku dhafnayd ee *Deyr*ta ka dib. Waxaa aad looga walaacsanyahay saboolka reer-magaalka ee qaybaha koonfureed ee Soomaaliya oo xaaladdooda nafaqo lagu sifeeyay ***Ba'naansho*** ilaa ***Aad u Ba'naansho***. Xaaladdan halista ah waxa inteeda badan keenay asbaabihii roob xumadii Deyrta sida waxsoosaarkii xoolaha iyo beeraha ee hoos u dhacay, kharashkii nolosha iyo heliddii ugu hooseysay habnololeed deggan oo korortay iyo weliba colaad guud oo sokeeye oo ka jirta gaar ahaan Koonfurta, saboolka reer-magaalka ayaa ka mid ah kooxaha ugu nugul. Magaalooyinka la baadhay xaaladdooda nafaqo ee Bartamaha, ayay kasoo baxeen sawirro kala duwan oo ***Digniin*** iyo ***Halis***-ba leh. Waxaa yaab leh, in saboolka Bartamaha lagu soo warramay inay helaan cunno kala duduwan oo ka badan inta ay helaan kuwa la midka ah ee Koonfurta waxaana middan loo badinayaa hawlaha samafalka ee cunno bixinta, nafaqada, biyaha iyo nadaafadda iyo helidda caanaha ee korortay xilligii kormeerku socday. Waqooyigalbeed iyo Waqooyibari, sawirro kala duwan ayaa kasoo baxay oo xaalad nafaqola'aan ***Ba'ani*** laga soo sheegay Laascaanood, Togwajaale iyo Burco, mid ***Aad Ba'an*** lagasoo sheegay Hargeysa iyo ***Digniin*** ilaa ***Halis*** laga soo sheegay magaalooyinka kale ee soo haray.

## SUUQYADA

### Exchange Trends

Shilinka Soomaaliga (SoSh) ayaa ku ekaaday halkiisii oon Isbeddelin (1-2% yuu isbeddelay) tan iyo Bishii 12aad 2009 ilaa Iyo dhammaadkii sanadkii tagay. Heerka kala beddelashada dhexdhexaadka ahi ee bishii 12aad 2010 ayaa u dhexeeyay min 30,943 to 31,746SoSh/dollar Maraykanka ee suuqyada Bartamaha, Waqooyibari iyo Koonfurta. Inkastoo shilinka uu xoogaysanayay tan iyo sanadkii sicir bararka ugu sarreeyay ee 2008, qiimiga lacagtu ayaa ku dhowaad 100 boqokiiba ka hooseysa markii la barbar dhigay heerarkii sicir bararka ka hor (Bishii 3aad 2007 oo loo fiirsho) dhammaan deegaanka SoSh lagaga adeegto. Dhanka kale, Shilinka Soomaalilaand (SlSh) ayaa ka sii xoogaysanayay Doolarka Maraykanka tan iyo Bishii 5aad 2010, si uu u gaaro heerkii ugu sarreeyay oo uu soo kabsaday 11 boqolkiiba Bishii 12aad 2010 (5,687/1 doolar ee Maraykan ah) ee sanadkii hore. Soo dhexgalka xukuumadda Soomaalilaand suuqyada sarrifka lacagaha (si ay u ilaaliso tirada SlSh wareegaya), dhoofka xoolaha ee xilligii Xajka, Iyo weliba deggenaanta jawiga siyaasadeed/dhaqaale ayaa ah waxyaalaha muhiimka ah ee sababay in SlSh uu soo kabsado. Marka la barbar dhigo celceliska Bilaha 12aad ee 5-sano (2005-2009), qiimiga lacagtani ayaa kacday 9 boqolkiiba Bishii 12aad 2010.

**Jaantuska 4: Isbeddelada Badeecadaha Dibada Laga soo Dejiyo**




### Sicirka Badeecada lasoo Dejiyo


Sicirka badeecada muhiimka ahi sida daqiiqda, Saliidda cuntada, sokorta iyo dhiisalka ayaa muujinaya isbeddel sare u socda labadii bilood ee dambeeyay (Bilihii 12aad 2010 iyo 1aad 2011) inta badan suuqyada gobollada (Tusaha 4). Kororyadan ayaa ka tarjumaya sicirka badeecada

1 Tirada dekedda Berbera kuma jiraan tiradii ka dhooftay Bishii 12aad 2010

cuntada ee ka kacaya suuqyada wax laga dhoofsho ee caalamka oo daba jooga cimiladii xumaatay oo si ba'an u saamaysay waxsoosaarkii sokorta, daqiiqda iyo saliidda cuntada (ee gallayda laga sameeyo) sanadkii 2010 qaar ka mid ah dalalka muhiimka ah ee soosaara iyo baahida degdegg ah ee loo qabo saliidda suuqyada caalamka. sicir kororyada ayay gobollada ku kala duwan yihiin kuna xiran tahay cashuuraha deegaanada ay qaadaan kharashka gaadiidka oo ku xiran masaafada suuqyada xogta laga soo qaado ay u jiraan dekadaha waaweeyn.

Waxaase taa ka duwan, sircirrada pariiska ayaa deggan koonfurta iyo Waqooyigalbeed uguna wacan tahay jiritaanka firida dalka oo ka raqiisisan, halka gobollada Waqooyibari iyo Bartamaha ee bariiska cuna oon haysanin firi kaloo ka raqiisisan uu si dhexdhexaad ah u kordhay.

**Jaantus 5: Isbeddelada Sicirbarar ee Heer Gobol**





### Karashka Nolosha ee Saboolka Reer-magaalka


Tusaha Qiimaha Adeegtaha (TQA) Dambiisha ugu Hooseysa ayaa muujinaysa isbeddello kala duwan gobollada dalka oo dhami ee sanadkii lasoo dhaafay. Sicir bararka ayaa si dhakhso ah u kacay Koonfurta (32%), Bartamaha (16%) Iyo Waqooyibari (11%), halka uu si dhexdhexaad ah uu u gaabiyay Waqooyigalbeed (12%). Isbeddelka TQA ayaa si aad ah u duufsada isbedbeddelka sicirka cuntada, sida badeecada cuntada lasoo dajiyo iyo weliba haruur caska sicirkiisa oo kordhaya (Koonfurta-74% iyo Bartamaha - 56%) ee SoSh lagaga adeegto. Dhanka kale, gaabinta sicir bararka ee dhulka SlSh lagaga adeegto ayaa inta badan ugu wacan hoos u dhaca sicirka haruurka (ku dhowaad 35%) uguna wacantahay sahayda firida dalka ka baxda (Haruurka cad iyo Galleyda) oo aad u sarreysa. Laga soo billaabo muddad saldhigga u ah ee Bishii 3aad 2007, si kastaba ha ahaatee, kororka ku dhacay TQA iyo KhYD (Kharashka ugu Yar ee Dambiisha) ayaa u dhiganta 85 - 152 boqolkii dhammaan dhulka SoSh laga adeegto, waxaana sababay ka dib markii uu saameeyay sicir bararkii (2007-2008), oo 8 boqolkiiba kaliya uu kordhay dhulka SoSh lagaga adeegto (Tushah 5).

## NAFAQADA

**Khariiradda 6: Qiyaasaha Xaaladaha Nafaqo, Guga 2010 Dabadii**





**Khariidadda 7: Qiyaasaha Xaaladaha Nafaqo, Deyrta 2010/11 Dabadeed**




Falanqayntii xaaladda nafaqada ee FSNAU ee Deyrtii 2010/11 ka dib ayaa muujinaysa in xaaladda nafaqo ay kasii darayso sida guud kooxaha dadka Soomaaliyeed muddo lix bilood ka hor (Khariidadda 6 Iyo 7). Intii u dhexeysay Bilihii 10aad ilaa 12aad 2010, FSNAU iyo hawlwadaagayaasheeda oo gaadhaya 24 ka qayb galayaaal ayaa ka qabtay kormeerro nafaqo habnololeedyada reer miyiga Soomaaliya oo dhan iyo koox dadeedyada barakacayaasha. 8 ka mid ah tiradaasi, waxay ku wajahnaayeen sida hadda xaaladda nafaqadu tahay ee heer habnololeed ama goboleed ee koondurta iyo bartamaha muddadii lixidii bilood ee la soo dhaafay, 8 waxay waxay ku wajahnaayeen habnololeedyada reer miyiga waqooyigalbeed iyo waqooyibari 8 kalena waxay ku wajahnaayeen dadka barakacayaasha (Tusaha 6). Falanqayntii natiijada ayaa muujinaysa nafaqodarri

ba'an oo heer qaran ah oo 16 boqolkii ah, oo 4 boqolkiiba nafaqola'aan daran tahay, oo macnaheedu tahay: 7 carruur ahiba 1 ayay nafaqola'aan ba'ani haysaa iyo 25 carruur ahiba 1 ayay nafaqo la'aan darani haysaa. Waxy middani fasiraysaa in ku dhowaad 241,000 carruur ahi ay nafaqo la'aan yihiin, 57,000 oo ka mid ahina ya nafaqola'aan darani hayso. Wadarta guud ee dhibanayaashani ayaa muujinaysa 7 boqolkiiba inay korortay intii ay ahayd lix bilood ka hor oo lagu qiyaasay in 230,000 ay nafaqola'aan ba'ani haysay (Gugii 2010). Marka la eego nafaqola'aanta ba'anee daran, waxay korortay 31 boqolkiiba.

**Jaantuska 6: Nafaqaddarada Guud iyo Midda Halista ah, Deyrtii 2010 (Bilaha 10aad – 12aad) 2010 WHOGS <-2WHZ % <-3WHZ iyo/ama Barar**




Balse, waxaa aad walaac u leh gobollada koonfureed, ooy intoda badani ay asiibtay cunno la'aan ba'an iyo gargaarkii bani'aadminimo oo la gaarsiin karin, laguna soo warbixiyay in heerka dhexdhexaad goboleedku yahay 25 boqolkiiba nafaqola'aanta ba'an ee caalamiga (GAM) iyo 6 boqokiiba nafaqola'aanta ba'anee daran (SAM), waxay taa ka tarjumaysaa 4 canugba in 1 ay nafaqola'aan ba'ani hayso iyo 23 canugba in ay 1 hayso nafaqola'aan darani hayso. Waxaa Koonfurta ku nool 75 boqolkiiba, ama 181,000, oo dhammaanba ah acarruur ay nafaqola'aan ba'ani hayso iyo 80 boqolkiiba, ama 46,000, ooy dhammaan ay hayso nafaqola'aan daran. Waxaa ku darid mudan, in ku dhow 16 boqolkiiba, ama 60,000 oo dumarka uurrayda iyo kuwa nuujinaya ah, ayaa halis ugu jira macaluul (MUAC < 23cm). Xaaladda koonfurta ayaa bidhaaminaysa u nuglaanshaha nafaqola'aanta ee dadka ku dhibban, xataa hal xilliyoo roobku xumaado dabadii. Lix bilood ka hor, heerar goboleedka wuxuu ahaa 16 boqolkiiba, oo muujinaysa in si aad ah ay uga dartay.

Helidda caanaha ee yaraatay, sicirka firida ee kordhaya iyo hoos u dhaca heerarka dakhliga ayaa ah waxyaalaha muhiimka ah ee sugnaanta cuntada ah ee saamaynaya xaaladda nafaqo ee dalka oo idil. Xagga koonfurta, gaar ahaan dadka beer-xoolodhaqatada iyo kuwa diil-webi, dhibka cudurrada ee ku badan ayaa sii xumaysay xadidnaanta helitaanka biyo badbaado leh iyo adeegii caafimaadka, waxaa kaloo xaaladda sii xumaysay hooyooyinkii oo aad ugu hawlan sidii ay cunno iyo biyo u heli lahaayeen. Colaaddan sokeeye ee weli ka socota koonfurta oo dhami ayaa weli xannibaysa in hayadaha caalamiga ay gaarsiiyaan gargaarkii si loo kafeeyo baahida dadka tabaalaysan.


Falanqayn ballaaran oo xaaladda nafaqada ee gobol iyo habnololeed ayaa lagusoo bayaanin doonaa Post Deyr 2010/11 Nutrition Technical Series, ee soo bixi doona Bisha 2aad 24ka , 2011.

## BAARISTA SUGNAANTAA CUNTADA ISKU DHAFAN

### MAGAALOOYINKA

Natiijadii ka soo baxaday kormeerkii tijaabada ahaa ee FSNAU ka qabatay magaalooyinka ku adeegta SISh (Waqooyigalbeed) iyo kormeerkii1 degdega ahaa ee laga qabtay magaalooyinka SoSh ku adeegta (Bilihii 12aad, 2010 - 1aad, 2011) iyo weliba falanqayntii xogta suuqyada muhiimka ah ayaa muujinaysa in xaaladda sugnaanta cuntada ee saboolka reer-magaalka ay ka sii darayso tan iyo Gugii 2010 ka dib. Qiyaasta iminka ayaa ina siinaysa 475,000 ruuxoo reer magaalka ahi ay dhibban yihiin, oo macnaheedu yahay in 53 boqolkiiba ay ka korortay tiradii Gugii 2010 ka dib. Tiradaa reer-magaalka ee dhibban ayaa 62 boqolkiiba ku suganyihii DCHB iyo 38 boqolkii yihiin GB. Inkastoo dhibka reer-magaalhu uu ku baahsan yahay dalka oo Idil, tirada ugu badan ee dadka dhibaataysan oo ah (60%) ayaa ku nool koonfurta deedna waxa soo raaca Waqooyiga ku addeegta SoSh (29%) iyo Bartamaha (11%). Sugnaanta cuntada reer-magaalka Waqooyiga ee SISh ku adeegta ayaan isbeddelin oo deggan, ahna Xadka Sugidla'aanta Cuntada (XSC).

**Jaantuska 7: Isbeddelada Xaddiga Isdhaafsi (Dakhli Shaqo maalmeed iyo Firiley)**




Hoos u dhaca sugnaanta cuntada ee reer-magaalka waxaa inta badan sababay sicir kororka cuntada ee aadka ah oo saamaynaya awoodda wax-iibsiga dadka reer-magaalka oo suuqa ku tiirsan. Hoos u dhaca sahayda firida, ooy u sbab ahayd dalagii ay waayeen gobollada koonfureed ee dlagga soosaara ee Soomaaliya, iyo kaydsiga firidii tiillay ee kordhiyeen beerallayda iyo ganacsatada ayaa si aad ah u kiciyay sicirka firida ee koonfurta iyo bartamaha (eeg qaybta Beeraha) saamaysayna kharashka nololsha. Matalan, kharashka ugu yar ee dambiisha (KhYD) ayaa korortay 13-19 boqolkii Koonfurta Iyo Bartamaha lixdii bilood ee dambe ee sanadka 2010, waxaa kaloo ay sare u dhaaftay KhYD sano hore (Bishii 12aad 2009) 16-32 boqolkii. Balse, kororka kharashka nolosha muuna raacin koror la mid ah qiyaasaha mushqaayadda. Si ka duwan,

ayay mushqaayaduhu hoos ugu dhaceen muddadii u dhexeysay bilihii 7aad - 12aad 2010 meelo ka mid ah dhulka reer-magaalka ee Bartamaha (17-38%), Koonfurt (13-33%) iyo Waqooyiga ku adeegta (6%) oo yaraynaya awoodda wax-iibsiga (Tusaha 15). Nidaamka kala gancsiga ee u dhexeeya mushqaayad maalmeedka iyo iyo haruurka, ayaa hoos u dhacay marka la barbar dhigo Bilihii 6aad ito 12aad 2009 hererkoodii Koonfurta (22-33% iyo 38-44%, waa siday isugu xigaane) iyo Bartamaha (38% iyo 44%). Waxaa taasi ka duwan, nidaamka kala ganacsiga ayaa deggan Waqooyibari ooy ugu wacan tahay degganaaanshaha sicirka firida, halka Waqooyigalbeed ay muujinayso koror muuqda oo ah (114%) sidi ay sano hore ahayd (Bishii 12aad 2009) una sabab ah sicirka firida dalka oo hoos u dhacday.

Dhibaatadan hadda haysata reermiyiga Koonfurta iyo Bartamaha iyo qaybo ka mid ah Waqooyiga ooy kordheen tirada barakacayaasha iyo xoolodhaqatada caydhowday ee soo galaysa magaalooyinka, ayay macnaheedu noqday inay aad u yaraato iskaalmaysigii bulshada, oo ah shabakadda badbaada muhiimka ah ay hoos u dhacdo xilli ay dhibaato ka jirto sugnaanta cuntada. Nabadgelyo darrida sii adkaysanaysa iyo qasnaanta ka jirta waddanka ayaa iyan culays ku sii ah xaladda, samaynaysana isu socodka agabka hawlaha suuqa, gaar ahaan caasimadda Muqdisho, iyo weliba gobollada Hiiran Iyo Bartamaha. Xaaladda sugnaanta cuntada ee Waqooyiga ku adeegta SoSh ayaan isbeddelin (oo ku sugan xaaladda DCHB) tan iyo Bishii 6aad 2010, marka laga reebo magaalada Ceerigaabo (GB) iyo Burco (XSC), oo kharashka nolosha ay xoogaa yar sare u kacday (3-6%). Hase yeeshee, sugnaanta cuntada ee reer-magaalka ee Waqooyiga ku adeegta SlSh ayaa muujinaya degganaansho marka la barbar dhigay qaybaha kale ee dalka iyadoo sicir bararku hooseeyo, nidaamka kala ganacsiga yahay mid deggan ama kordhay uguna wacan tahay sicirka firida een isbeddelin ama hoss u dhacay (eeg Qaybta Beeraha), iskaalaysiga bulshada oo xooggan iyo xaladda nabadgelyada ee degganee ka jirta aaggaasi.


Xaaladda nafaqada ee saboolka reer-magaalka Soomaaliya aayaa muujinaysa xaalad la walaaco, sida ay daaha ka qaaday falanqayntii isku dhafnayd ee Deyrta ka dib. Waxaa aad looga walaacsanyahay saboolka reer-magaalka ee qaybaha koonfureed ee Soomaaliya oo xaaladdooda nafaqo lagu sifeeyay Ba'naansho ilaa Aad u Ba'naansho. Xaaladdan halista ah waxa inteeda badan keenay asbaabihii roob xumadii Deyrta sida waxsoosaarkii xoolaha iyo beeraha ee hoos u dhacay, kharashkii nolosha iyo heliddii ugu hooseysay habnololeed deggan oo korortay iyo weliba colaad guud oo sokeeye oo ka jirta gaar ahaan Koonfurta, saboolka reer-magaalka ayaa ka mid ah kooxaha ugu nugul. Magaalooyinka la baadhay xaaladdooda nafaqo ee Bartamaha, ayay kasoo baxeen sawirro kala duwan oo Digniin iyo Halis-ba leh. Waxaa yaab leh, in saboolka Bartamaha lagu soo warramay inay helaan cunno kala duduwan oo ka badan inta ay helaan kuwa la midka ah ee Koonfurta waxaana middan loo badinayaa hawlaha samafalka ee cunno bixinta, nafaqada, biyaha iyo nadaafadda iyo helidda caanaha ee korortay xilligii kormeerku socday. Waqooyigalbeed iyo Waqooyibari, sawirro kala duwan ayaa kasoo baxay oo xaalad nafaqola'aan Ba'ani laga soo sheegay Laascaanood, Togwajaale iyo Burco, mid Aad Ba'an lagasoo sheegay Hargeysa iyo Digniin ilaa Halis laga soo sheegay magaalooyinka kale ee soo haray.

## XOGTA MIYIGA (BAADIYAHA)

Falanqayntii isku dhafnayd ee sugnaanta cuntada ee ku slaysnayd habnololeedyadsalaysnayd habnololeedyada ee Deyrtii 2010/11 ka dib ayaa muujinaysa in xiisad banii'aadminimo oo ba'an ay haysato illaa hal malyuun oo qof oo reer-miyi ah Soomaaliya, ooy 650,000 yihiin DCHB, iyo 355,000 yihii GB (Khariidada 8). Tirada dadka ee dhibban ayaa korortay 28 boqlkiiba tan iyo Gugii 2010 muhimmaduna tahay natiijadii ka dhalatay roobabkii Deyrta ee baaqday, oo saameeyay beerallayda iyo xoolodhaqatadaba.

Ku dhowaad 515,000 oo qof oo diil-webi ee koonfurta iyo Bartamaha, oo u dhibban waxsoosaarkii Deyrta 2010 ee baaqday ayaa ah tirada ugu badan ee dadka reer-miyiga ee dhibban. Si kastaba ha ahaatee, tiro wax ku ool ah oo xoolo-dhaqato ah (435,000) ayay saamaysay biyo la'aan ba'an, daaqiiyoo dhammaadaay, hantidii xoolaad oo yaraatay iyo sicirkii xoolaha oo hoos u dhacay. Haddi aan kala qaadno gobollada, Hiiraan ayay ku noolyhiin tirada ugu badan ee dadka reer miyiga ee dhibaataysan una dhiganta 195,000. Waxay tiradani u taagan tahya 75 boqolkiiba tirada guud ee dadka gobolka, waana halka a ugu badan yihiin dadka reer-miyiga ee dhibaataysan ee Soomaaliya.

**Khariidadda 8: Dheehidda Baahsan ee Wejiyada Sugnaanta Cunnada ee Soomaaliya, Dadka Reer Miyiga, Saadaalin, Bilaha 1aad –6aad, 2011**



***Gobolka Gedo***

Ka dib markii la helay xoogaa horumar ah Gugii lasoo dhaafay, xaaladda sugnaanta cuntada ayay kasii dartay Deyrtii 2010/11 habnololeedyada beer-xoolodhaqatada iyo xoolodhatada ee gobolka Gedo. Hadda 50,000 oo qof oo reer-miyiga gobolka Gedo ah ayaa lagu qiyaasay inay dhibban yihiin oo 5,000 ay yihii GB iyo 45,000 ay yihii DCHB oo muujinaysa 67 boqolkiiba inay korotay dadka dhibaataysan ee Guga 2010 ka dib. In ku dhow 27,000 oo qof ah xooloshaqatada Daawa ayaa ku jiraan DCHB, halka 15,000 ay yihiin habnololeedyada beer-xoolodhaqatada (Beer-xoolodhaqatada Koonfureed iyo Beer-xoolodhaqatada Baay-Bakool), oo intooda badani (79%) ay ku jiraan DCHB iyo heerka digiinta hore oo ah Ilaalo ayaa laga helay habnololeedyada beer-xoolodhaqatada. Xaaladda sugnaanta cuntada ee diil-webi Gedo ayaa muujinaysa xoogaa horumar ah tan iyo xilligii Guga ee lasoo dhaafay halkaasoo ay hadda ku dhoqaad 2,000 oo qof ay ku jiraan DCHB iyo Ilaalo. Geel Dhaqatada Koonfureed ayaa ku jira Xadka Sugnaanta Cuntad (XSC), ooy wehliso Halis Dhexdhexaad ah inay ugu jiraan inay galaan DCHB. Waxaa intaa dheer, tiro lagu qiyaasay 25,000 oo reer-magaal ah ayaa iyana dhibban (20,000 waxay ku jiraan DCHB iyo 5,000 oo iyana ku jira GB).



*Shaqo-helista Dhulka Webiyada. Hamare, Doolow, Gedo, FSNAU, Bisha 12aad 2010*

Sii xumaanshaha xaaladda sugnaanta cuntada ayaa ugu wacan dhowr waxyaalood iyo waxsoosaarkii dalagga ee ebaaqday ka dib markii awayxtarkii roobabkii Deyrta ay xumaadeen, sicirka firida ay kordheen, xooluhuna hayaameen, helitaanka caanahana yaraadeen, iibka xoolaha iyo caanahana xadidmeen; iyo awoodda wax iibsigana hoos u dhacday. Waxsoosaarka firida gobolka ee xilligan ayaa lagu qiyaasay 22 boqokii Celceliska Deyrihii Dagaalladii ka Dib (CDD) (1,200MT oo Galley kaliya) hoos u dhacna lagu arkay habnololeedyada beer-xoolodhaqatada iyo diil-webi. waxsoosaar yaridu waxay macnaheedu tahay hawl beereedkii oo yaraaday, ooy tahay fursadihii shaqada ee qooysaska saboolka oo hoos u dhacday.

Nidaamka kala ganacsiga ee ka dhaxeeya mushqaayadda shaqo iyo firida ayaa si aad ah hoos u dhacday (hoos u dhac 33 – 57%) inta badan dhulka beer-xoolodhaqatada iyo kuwa diil-webi, uguna wacan tahay sicirka firida oo kacday ka dib markii waxsoosaarkii baaqday. Si kastaba ha ahaatee, qaar ka mid ah qooysaskani ayaa heysta kayd firi (haruur iyo galley) oo dhamman karta 3-4 bilood, uguna wacnayd waxsoosaarkii Gugii 2010 oo wanaagsanaa. Sidoo kale, dhammaan habnololeedyada xoolodhaqatada (Daawa iyo Geel dhaqatada Koonfureed) ayaa saameeyay roobabkii Deyrta ee xumaaday, oo sababay in xaladda daaqa uu xumaado biyihana ay aad u yaraadaan. Waxay arintani saamaysay xaaladda jirka xoolaha iyo waxsoosaarkooda. tirada xoolaha ee lo'da iyo idaha iyo riyaha ayaan kasoo kabsanin xilliyadii hore ee abaarta ahayd waxayna si aad ah uga hooseeyaan xoolaha lihi ayaa saamaysay caano yari, sicirka xoolaha oo hoos u dhacay iyo nidaamka kala ganacsiga oo xumaaday. Kaasi oo isweydaarsiga riyaha dabaaxa ahi iyo haruur caska ee Bishii 12aad 2010 oo hoos u dhacay tan Iyo isla bishaa oo sano hore ah oo kala ah heerar kala duwan, una dhexeeya 20 ilaa 70 boqolkii, waxayna ku xidhan tahay heerarka sicirka haruurka uu kordhay (30 – 100% oo koror ah) iyo sicirka xoolaha oo ku xiran naaxsanaanta xoolaha.

Xaaladda nafaqada ee gobolka Gedo ayaa ah mid Aad u Ba'an dhammaan habnololeedyada, oo awal ahayd mid Ba'an xoolodhaqatada iyo reer-webiga tan iyo Gugii 2010. Beer-xoolodhaqatada ayaa Iyagu xaaladdooda deggan tahay. Waxaa middani ugu wacan xadidnaanta helidda cuntada oo ka timid abaartii ku habsatay beeraha Iyo xoolaha waxsoosaarkooda; hawlihii samafalka oo khalkhal galay oo saameeyay gaarsiinta hawlaha caafimaadka iyo nafaqada; cudurrada oo aad u batay iyo addegsiga dhaqammada caafimaad darrida; xadidnaanta helidda biyo saafiya, adeegga nadaafadda & cafimaadla iyo quudin xumada dhallaanka iyo caruurta. Waxyaalaha kaalmada ah aya ka mid ah iskaalmaysiga bulshada ee yar, dhuxul gubidda oo badatay si dakhli cunno laguu Ibsado loo helo (balse muddo dheer dabadeed waxyeello u noqon doonta bayadda) iyo iibinta balka iyo cawska ee dadka reer-webiga si uga helaan dakhli ay ku iibsadaan cunno iyo alaaboba.

***Juba Regions***

Xaaladda sugnaant cuntada ayaa weli kasii dareysa gobollada Jubbooyinka oo habnololeedyada qaar oo ay dhibi haleeshay. Dhulka reer-webiga ayaa kusii jiraya GB tan iyo Gugii 2010, halka habnololeedyo kale ay iyagu dhibban yihiin. Waxaa ka mid ah habnololeedyada Xoolodhaqatada Koonfur-bari, Beer-xoolodhaqatada Koonfureed iyo Beer-xoolodhaqatada Jubbada Hoose oo lagu sifeeyay wajiga DCHB oo Aad Halis ugu jira in xaaladdu ay sii xumaato ooy noqdaan GB xilligii Deyrtan 2010/11 ka dib. Iminka, 125,000 oo dadka reer-miyiga ah ee gobollada Jubbooyinka ayaa lagu qiyaasay in ay dhibban yihiin, oo 60,000 ay yihiin GB iyo 65,000 ay yihiin DCHB, ooy tiradu ku yara badan tahay Jubbada Hoose (65,000). Waxaa intaa dheer, 55,000 oo dadka reer-magaalka ahi oo iyana la ogaaday inay dhibban yihiin, oo 25,000 ka mid ahi ay yihiin GB iyo 30,000 kalena ay yihiin DCHB. Waxaase taa ka duwan, xoolodhaqatada dhulka koonfureed iyo kuwa xeebta ay iyagu yihiin XSC ahna Ilaalo, ahna sidii Gugii 2010 kadib.

Xaaladda kasii daraysa ee dhulka beer-xoolodhaqatada iyo reer-webiga ayaa inta badan ugu wacan dalagii lumay (haruur iyo gallay) ka dib markii ay waxtarkii roobabkii Deyrta ay xumaadeen. Xaaladda dhulka reer-webiga dhabtii kasii xummaanaysa ka dib markii laba xilli oo isku xigata ay dalaggii ba'een sida fatahaddii Guga 2010 oo sababay hoos u dhac weyn waxsoosaarkii firida. Si kastaba ha ahaatee, qoysaska reer-webiga waxay heleen waxsoosaar wanaagsan oo xilligiisii daba maray ooy goosteen Bilihii 9aad ilaa 10aad 2010. sidaa daraadeed, waxaa jira xoogaa kayd ah ooy haystaan qoysaska, gaar ahaan kuwa deggan gobolka Jubbada Dhexe, iyadoo weliba la sugayo In la goosto gallay xilligeedi daba martay Bisha 3aad. Dhulka beer-xoolodhaqatada ayay dhammaan beerihii ka ba'een Deyrtii 2010 ka dib markii ay goosteen firi aad u badan Gugii 2010. Sidaa daraadeed, kayd haruur ah ayay habnololeedka beer-xoolodhaqatada haystaa oo ku filan ilaa 3 bilood.



*Lo' Xaaladdeedu liidato. Dhesheegga Waamo, Afmadow, Jubbada Hoose, FSNAU, Bisha 12aad 2010*

Xaaladda sii xumaanaysa ee habnololeedka lo'da dhaqda ee Xoolodhaqatada Koonfur-bari ee Gobollada Jubba ayaa ka dhashay waxyaalo isbiirsday ooy ka mid yihiin cawskii iyo caleentii oo dhakhso u dhammaaday, biyo la'aan ba'an, cudurrada caadiga ah oo kordhay, ka dib markii ay goor hore u hayaameen dhulka webiyada, suuqii lo'da ee Gaarisa oo istaagay saameeyayna iibkii xoolaha, iibintii caanaha oo yaraatay, sicirka biyaha iyo cuntada oo sarreeya iyo awoodda wax iibsiga ee xoolodhaqatada oo nabaad guurtay. Hoos u dhac aad ah oo ku dhacay nidaamka kala ganacsiga ee u dhexeeya mushqaayad maalneedka iyo firida ayaa lagu arkay dhammaan habnololeedyada ay dhibaatadu saameeysay. Qoysaska saboolka ee dhulalkaasi iyo ayaa ku maareeya noloshooda inay u kicitimaan meelaha dhuxusha laga soosaaro iyo magaalooyinka waaweyn si ay ugasoo helaan kaalmo qaraabadooda.

Xaaladda nafaqo la'aanta ee Jubba aya kasii dartay oo gaartay heer Aad u Ba'an dhammaan kooxaha habnololeedyada, oo awal ahayd Halis, iyo u badan tahay Ba'naan dadk beer-xoolodhaqatada, iyo u badantahay Aad u Ba'an bulshada reer webiga, lixbilood ka hor. Heerarka nafaqo la'aanta ba'an ee caalamiga ayaa hadda sare u dhaafay 25% dhammaan habnololeedyada. Waxay xaaladda ugasii dartay helidda cuntada oo sii xadidantay uguna wacneyd abaarta saamaysay waxsoosaarkii xoolaha iyo beeraha; hawlihii samafalka ee hakadka galay ayaa saameeyay gaarsiintii cuntada, hawlihii caafimaadka iyo nafaqada; cudurradii iyo dhaqammadii caafimaad darrada keenayay oo kordhay; helidda biyo saafiya, hawlihii nadaafadda iyo caafimaadka oo xadidantay iyo quudin xumada dhallaanka iyo carrurta.

***Gobollada Baay iyo Bakool***

Xaaladda guud ee sugnaanta cuntada ee gobollada Baay iyo Bakool ayaa kasii dartay tan iyo Gugii 2010 ka dib, sida muuqata oo ah in 68 boqolkiiba ay korortay tirada dadka ee dhibban. Hadda tiro lagu qiyaasay 185,000 oo reer-miyi iyo reer-magaalkaadka Intiisa badan (81%), ama 150,000, ayaa ku sugan DCHB, halka 35,000 ay ku jiraan GB. Ku dhowaad 90 boqolkiiba ee dadka reer-miyiga dhibban ayaa deggan gobolka Bakool oo ah qiyaastii 95,000 (90,000 in DCHB iyo 5,000 oo ah GB) intooda badanna waa beer-xoolodhaqatada (47,000 oo ah habnololeedka Beer-xoolodhaqatada Bakool iyo 35,000 oo ah Beer-xoolodhaqatada Baay-Bakool Awoodoodu Hooseyso), balse xoolodhaqatada ayaa aad uga dhex muuqan tiradan (Geel-dhaqatada Koonfureed). Heerka digniin horaadda ayaa lagu sifeeyay Ilaao dhammaan habnololeedyada reer-miyiga Bakool. Waxaa Intaa dheer, 30,000 oo reer-magaalka Bakool ayaa DCHB (5,000 qof) ama GB (25,000 qof). Gobolka Baay, inta badan dadka beer-xoolodhaqatada ayaa kusii sugan XSC oo ah sidii Gugii 2010 ka dib, marka laga reebo qaybo ka mid ah dadka beer-xoolodhaqatada Baay-Bakool ee Baydhabo iyo degmada Buur Hakaba, oo Halis Aad ah ugu jira inay kasii darto xaaladda ooy galaan DCHB uguna wacan tahay waxsoosaarkii dalagga ee baaqday ka dib markii waxtarkii roobabkii Deyrta ay xumaadeen. Xaaladda sugnaanta cuntada ee dadka reer-magaalka ee gobolka Baay ayaa aad uga sii dartay kadib markii sicirrada firida iyo badeecadaha lasoo dajiyo ay kaceen hayadihii samafalkana xayirmeen. Qiyaastii 45,000 oo reer-magaalka ahi ayaa dhibban gobolkan (43,000 oo ah DCHB iyo 2,000 oo ah GB).

Xaaladda sugnaant cuntada ee hebnololeedyada gobollada Baay-Bakool ayaa kasii dartay tan iyo Gugii 2010 ka dib uguna wacan tahay dalagii baaqday (10% iyo 8% CDD ee Bakool iyo Baay, waa siday isugu xigaane), Cawska, caleenta iyo biyaha oo liidata ayaa sababay In xooluhu weydoobaan qiimigoodana hoos u dhaco, caanihii la iibinayayna yaraadaan, iskaalmaysigii bulshadana yraato sicirka firidana kacdo.

Nidaamka kala ganacsiga ee u dhexeeya shaqada iyo firida iyo rida/firida muujiyay isbeddel hoos u dhac ah, oo si daran u saamaysay awoodda wax iibsiga ee qoysaska saboolka iyo kuwa dhexdhexaadka ah. Xudur, isweydaarsiga rida dabaaxa Iyo haruurka ayaa 56 boqolkiiba hoos u dhacay Bishii 12aad 2010 (min 79kgs/ridii ilaa 35kgs/ridii) marka la barbanrdhigo Bishii 12aad 2009, ka dib markii sicirka rida dabaaxa ahi oo hoos udhacay (22%) sicirka haruurkana uu kordhay (78%) Isla mudadaa. Baydhabo, isweydaarsiga ayaa isna u jahaysan isbeddel kaa la mid ah. marka laga reebo u tartanka shaqada xirfadlaawaha ka dib



*Dalagga Masaggada oo Abaarsaday, Boodaan, Rabdhuure, Bakool, FSNAU, Bisha 12aad 2010*

warbixinta kooban ee gobollada

markii reer-miyiga usoo guureen si ay shaqo u helaan, heerka mushqaayadda shaqada ayaa weli deggan. Sikastaba ha ahaatee, isweydaarsiga mushqaayad maalmeedka shaqo/haruur ayaa yaraaday labada gobolba ka dib markii mushqaayaddan aanay isbeddelin sicirka haruurkana uu kordhay. Tirada xoolaha ee nimcoolayda oo dhan ayaa ka hooseysa heerarkii gundhigga, kadib markii ay ku habsatay abaaro hore iyo abaartanba iyo weliba hoos u dhac uu ku yimid idaha iyo riyaha tan Iyo Gugii 2010 ka dib uguna wacan tahay xoolaha ka baxay oo badan.

Xaaladda nafaqada ee habnololeedyada beer-xoolodhaqatada iyo xoolodhaqatada ee gobollada Bakool iyo Baay ayaa weli loo badinayaa mid Aad Ba'an, tan iyo xilligii Guga ee lix bilood ka hor. Waxaa middani sababay helidda cuntada oo liidata iyo heerka cudurrada oo sarreeya ee dhulkaasi. Waxyaalaha lala xiriirinayo xaaladda nafaqada ayaa ah: sugnaanta cuntada ee sii liidanaysa uguna wacan tahay waxtarkii roobabkii Deyrt ii 2010 oo liitay deedna dalagii baajiyay caateeyayna xoolihii; cudurradii deegaanka/xilliyeedka oo kordhay khaasatan, xiiq-dheerta, dulnoolaha mindhicirka Iyo shubanka; gargaarkii samafalka oo yaraaday Iyo fursadihii helidda dakhliga oo xadidmay. Aqoonta, dareenka iyo ku dhaqanka habka quudinta dhallaanka iyo caruurta oo liidata ayaa iyana ah waxyaalaha halista ah.

***Shabeellada Hoose iyo Dhexe***

Xaaladda sugnaanta cuntada ee gobollada Shabeellooyinka ee xilligan ayaa liidata, ka dib markii roobabkii Deyrta ee la waayay, gaar ahaan Shabeellada Dhexe. wadarta guud oo 85,000 oo qof oo ku nool Shabeellada Dhexe ayaa lagu qiyaasay inay dhibban yihiin oo 15,000 ay yihiin GB (5,000 waxay ka yimaadeen Beer-xoolodhaqatada Bartamaha iyo 10,000 oo ka yimid Xoololdhqatada Deexda) oo heerka digniinta horena ay yihiin Ilaalo. Intasoo hartay oo 70,000 (5,000 Beer-xoolodhaqatada Bartamaha, 12,000 Deexda, 11,000 reer-webiga iyo 42,000 Beer-xoolodhaqatada Koonfureed) oo dad aya lagu sifeeyay inay ku jiraan DCHB oo heerka digniinta horena tahay Ilaalo. Habnololeedyada intooda badan aya ku sugan XSC iyo weliba Halis Dhexdhexaad ah inay kasii darto ooy galaan DCHB marka laga reebo Beer-xoolodhaqatada Koonfureed ee (degmada Wanlaweyn) oo iyadu Halis Aad ah ugu jirta inay kasii darto ooy ku dhacaan DCHB (9,000 qof ayaa ku jira DCHB). Waxaa la mida ah, xaaladda sugnaanta cuntada ee habnololeedka reer-magaalka ee labada gobol ooy ka muuqato sii xumaasho tan iyo Gugii u dambeeyay 2010 ka dib. Wadarta guud dadka reer-magaalka ee labada gobol ayaa hadda lagu qiyaasay 92,000 qof, ooy 39,000 ka mid ahi yihiin DCHB iyo 53,000 oo ah GB



Sisin Bixiddeedu wanaagsan Tahay, Goosaaroow, Qoryooley, Shabeellada Hoose, FSNAU, Bisha 12aad 2010

Roobabkii oo dhammaanba la waayey ayaa sababay waxsoosaarka beeraha inay liitaan (46% iyo 23% CCD ee Shabeellada Dexe iyo Hoose, waa sida ay isugu xigaane) sicirka firidana uu kaco. Si kastaba ha ahaatee, dalagga iibka oo ka mid yihiin sisinta, khudaarta (qajaarka, caleenta, basasha, tamandhada, paspaaska, iwm.), Miraha, digirta, mooska, balka/cawska, iwm. oo wadanka lagaga dhaqmo ayaa hanatay fursadaha shaqo ee qoysaska saboolka iyo qaybta hoose kuwa dhexdhexaadka ahi. Deyrtii 2010/11 ayaa lagu qiyaasay waxsoosaarka dalagga iibka 7,700MT (3,800MT ayay ka timid Shabellada Dhexe iyo 3,900MT waxay ka timid Shabellada Hoose). Waxaa kaloo intaa dheer, kuwo kale oo kanaalada waaweyn iyo kuwo yaryar iyo weliba jidad ku yaala Shabeellada Hoose ayaa la hagaajiyay, oo siiyay fursado dheeri ah oo dakhli lagu helo. Kaydka firida (Galley) ee hadda ee reer-webiga Shabeelle ayaa lagu qiyaasay inay ku filantahay 10 – 12 bilood qooysaska dhexe iyo kuwa ladan lagana yaabo inay ka badan tahay Shabeellada Hoose sida ay muujinayso falanqaynta (eeg Qaybta Beeraha), uguna wacan tahay waxsoosaarkii Galleyda ee Guga 2010 oo aad u wanaagsanaa. Waxaa taa ka duwan, saboolka beer-xoolodhaqatada degmada Wanlaweyn ee Shabeellada Hoose, oo iyada inta badan dakhligooda ku tiirsan yahay iibka firida, ayaan haysanin kayd firi oo xilligii hore ah uguna wacan tahay haruurkii Deyrta oo gabi ahaantiiba baaqday iyo kharash badan oo iibka biyaha iyo cawsba la galay.

Sicirka gallayda ee habnololeedka diil-webi ayaa kordhay 57 boqolkiiba marka lagasoo billaabo bishii 12aad 2009 ilaa Bishii 12aad 2010. Sicirka firida ee sida aadka ah u kacay iyo hoos u dhaca yaree ku dhacay mushqaayad maalmeedka, ayaa u horseeday in si aad ah uu hoos ugu dhaco isweydaarsiga u dhexeeya mushqaayad maalmeedka iyo firida iyo rida iyo firida ee labada gobolba. Isweydaarsiga shaqo iyo galleyda ayaa hoos u dhacday 40 boqolkiiba (min 10 kg ilaa 6kg/heerka shaqo maalmeedka) ee habnololeedka diil-webi ee Bishii 12aad 2010 ilaa sanadii lasoo dhaafay. Muddadii u dhexeeysay, isweydaarsiga rida iyo haruurka iyaa iyana dhacay 48 boqolkiiba (min 141 ilaa 73kg/ridiiba). Hoos u dhaca ayaa sababay sicirka xoolaha ee hoos u dhacay maadaama aycaatoobeen ka dib markii ay la kulmeen roob la'aan muddo dheer ah xilligii Deyrta iyo sicirkii firida oo kacay.

Xaaladda nafaqada ee habnololeedyada beer-xolo dhaqatada iyo diil-webi ee gobollada Shabeellada Dhexe iyo Hoose aya kasii dartay oo laga yaabo mid Ba'naan ah awelna ahayd xaalad Feejignaan (Shabeellada Dhexe) iyo laga yaabo mid Halis ah (Shabeellada Hoose) ooy ku wajahnaayeen Gugii 2010.

Helidda waxsoosaarka xoolaha iyo beeraha oo xadidmay ooy ugu wacnayd roobabkii Deyrta ee baaqday, shuban biyood lagu soo warramay inay dillaaceen, duumo, jadeeco, xiiqdheer iyadoo aanay jirin hawlo caafimaad oo wax ku ool ah, ayaa ka mid ah waxyaalaha horseeday. Waxaa xaaladda sii xumeeyay colaadda sokeeye oo khalkhal galiya ganacsiga, barakac iyo hawlihii samafalkan xannibay. Si kastooy tahayba, waxa ka socda mashruuc quudinneed haba yaraadee, iskaalmaysiga bulshada iyo dakhliga laga helo iibka balka/cawska iyo xoogaa fursada shaqo oo laga helo diil-webi, oo laga yaabo inay sahlaan xaaladda nafaqo la'aanta. Xaaladda nafaqo la'aanta ee barakacayaasha Afgooye ee liidata oo 21 boqolkiiba GAM, ayaa si kastaba ha ahaatee walaac leh oo awel ahayd 15 boqolkiiba lixdii bilood ka hor.

***Gobolk Hiran***

Xaaladda`Sugnaanta cuntada ayaa ka sii daraysa gobolka Hiraan, halkaasoo dhammaan habnololeedyada ay ku sifaysan yihiin GB oo heerka digiintana tahay Ilaalo. Nattijada sugnaanta cuntada ee Deyrta 2010/11 ayaa muujinaysa in tirada dadka ee dhibban uu kordhay 8 boqolkiiba tan iyo Gugii 2010 oo haddana u dhiganta 195,000 qof, una taagan 75 boqlkiiba dadka reer-miyiga. Qiyaastii 67 boqolkiiba ee dadkan ayaa ku jira GB inta soo hartayna waxay ku jiraan DCHB. Habnololeedka beer-xoolodhaqatada ayaa uguu liita oo 125,000 qof ay dhibban yihiin, ka dib markii reer-webiga oo(30,000 qof ay iyana dhibban yihiin) iyo Geeldhaqatada Koonfureed (30,000 qof ayaa dhibban). Xaaladda reer-magaalka ayaa iyana kasii dartay, halkaasoo hadda 35,000 qof la ogaaday inay dhibban yihiin, oo 30,000 ka mid ah ay yihiin GB iyo 5,000 yihiin DCHB. Xaaladda kasii daraysa ayaa inta badan ugu wacan xilli kale oo roobabkii Deyrta 2010 xummaadeen, oo sababtay dalagii beeraha ay ba'aan una horseeday xaaladda baadka inay kasii liitaan biyuhuna ay aad u yaraadaan. Dabadeedna, xoolihii caatoobaan, yaraatana tiradii xoolaha ee iibsami kari lahayd, heerka dhalmada xoolaha oo hoos u dhacay, hayaankii xoolaha oo kordhay Iyo caanihii oo yaraaday. Tirada xoolaha ee saboolku leeyahay ayaa aad u yaraatay ka dib markii ay dhowr xilli oo abaar ah soo mareen (geela 46%, lo'da 33% iyo idaha/riyaha 64% ah marka loo fiirsho heerka gundhigga ee Bisha 6aad 2011).

Hoos u dhaca sahayda firida dalka oo ugu wacan tahay dalagii baaqday ee koonfurta, ayaa horseeday in sicirka firiaa ee gobolka uu si wax ku ool ah u kaco, halkaasoo marka la wadaajiyo fursadaha dakhliga saboolka iyo deymihii la galay, ayaan fillaanin qooysaska reer-magaalka iyo reer-miyiga inay awood helaan Inay cunno ku filan soo iibsadaan. Isweydaarsiga shaqo iyo firida iyo weliba rida dabaaxa iyo firida ayaa si aad ah u yaraaday, maka la barbardhigo Bishii 12aad 2009, ilaa 36% (min 11kg/maalin shaqo ilaa 7kg/maalin shaqo) iyo 51% (min 95kg/ ridii ilaa 47kg/ridii), waa siday isugu xigaane. Heerarkii iskaalmaysiga bulshada sida "zakada" ayaa iyana yaraatay ka dib markii dalgii baaqday tiradii xoolahana yaraadeen. Colaad sokeeye oo ballaaran iyo tirada barakacayaasha oo sii kordhaysa, gaar ahaan magaalada Beletweyn, ayaa si wax ku ool ah u saamaysay reer-migii Hiiraan ka dib markii ay siyaadday u tartankii shaqada iyo kaalmada bulshada, iwm.

Xaaladda nafaqada ayaa sii ahaanaysa weji u badan Aad u Ba'anan tan iyo Gugii 2010. Tirada barakacayaasha gobolka ee koordhaysa, baaxadda samafalka ee sii koobmaysa, sugnaanta cuntada ee sii xumaanaysa, shuban-biyoodka iyo xiiq-dheerta lagu soo warbixiyay inay ka dillaaceen gobolka, iyadooy yar tahay helidda xarumaha caafimaadka iyo sahayda dawooyinka ee dhulkaasi ayaa xaaladda sii xumeeysay.



*Lo' Xaaladdeedu Liidato, Dhulka Xooro-beero Dhaqatada, Buulo Burte, Hiiraan, FSNAU, Bisha 12aad 2010*

***Gobollada Dhexe***

Gobollada dhexe ee Soomaaliya ayaa weli kusii harsan GB 7 xilli oo isku xigta. Abaarta raagtay ayaa sii xumysay xaaladda sugnaanta cuntada habnololeedyada Deexda, Digir Tabcatada iyo dhinaca bari ee Cadduunka. Waxaase ka duwan, xaaladda xoolodhaqatada Hawdka oo inyar soo roonaatay ka dib markii ay heleen roobab dhexdhexaad ah billowgii xilligii Deyrta, halka waxtarkii xilligii Guga 2010uu ahaa mid aad u wanaagsan dhammaan habnololeedkan. Kasoo rayntani waxaa kaloo lagu arkay galbeedka Cadduunka, oo ka faa'iiday daaqa wanaagsan ee habnololeedka Hawdka ee deriska la ah, iyo weliba raaxaysanaya xaaladda nabadgelyada ee deggan iyo waddooyinka wanaagsan ee isku xira. Hadda, wadar guud oo 228,000 oo reer-miyi ah ayaa lagu qiyaasay inay dhibban yihiin, oo 9 boqolkiiba ka yar tiradii Guga 2010. Tirada dadka tabaalaysan ayaa intooda badan (62%) ku jira DCHB, halka tirada kale ee dadkani ay ku jira GB ay si wax ku ool ah u kordheen tan iyo Gugii 2010, oo mujinaysa in dhibaatadu Bartamaha ay sii fogaanayso. Xaaladda reer-magaalka ayaa iyana si aad ah u sii xumaanaysa, halkaasoo tirada dadka dhibbani ay sare u kacday tan iyo Gugii 2010. Si kastaba ha ahaatee, dadka ugu badan ee dhibban ayaa weli ah reer-miyiga (82%), oo lagu daray xoolodhaqatada cayroowday (25,000 qof ah). Heer digniin horaad ah oo Ilaalo ah ayaa lagu sifeeyay gobolka ilaa dhammaadka Bisha 6aad ee 2011.



*Ilma Yar oo La Jooga Xoolo Soo Haray. Tuulada Qosol-Tire, Xarardheere, Mudug, FSNAU, Bisha 12aad 2010*

Xaaladda sugnaant cuntada ee habnololeedyada bariga Cadduun, Deexda iyo Digir Tacbatada gobollada dhexe ayaa kasii daraysa ka dib waxyaalo isbiirsaday oo dhowr xilliyoo waxtarka roobabkoodu xumaayeen, xoolo badani baxeen, xoolaha iibsami kara yaraadeen, waxsoosaarkii caanaha yaraadeen, sicirka firida oo aad u sarreeya iyo nabadgalyada bulshada oo kasii daraysa. Waxaa kale, xoolodhaqatada habnololeedyadan ayaa la kulmay biyo I'aan ba'an, oo keentay biyo dhaamis goor hore billabmay kordhiyayna hayaanka xoolaha, oo culays saaray hantidii qoysaska si ay u awoodaan biyahan qaaliga ah (63% kordhay tan iyo Bishii 12aad 2009) iyo kharashka hayaanka ku baxa. Isla waqtigaasi, dakhliga laga helayay iibka caanaha iyo xoolaha ayaa hoos u dhacay ka dib markii la heli kari waayay, inkastoo sicirka xooluhu ay wanaagsan yihiinmarka la barbardhigo isla waqtigaa ee sano hore (5% ayuu kordhay sicirka rida dabaaxa ah marka loo eego Bishii 12aad 2009). Xaaladda ugu xumi

warbixinta kooban ee gobollada

waxay ka jirtaa habnololeedyada Deexda iyo Digir Tacabatada, halkaasoo lagusoo warbixiyay In xoolo badani dhimanayaan ka dib markii ay waayeen daaq iyo biyo iyo fursad hayaanna la waayay. Sicirka firida dalka ay kacay (67% marka la barbardhigo Bishii 12aad 2009), ka dib markii wasoosaarka firid ee koonfrta uu baaqday, ayay saamaysay awoodda waxiibsiga ee dadweynaha reer-miyiga iyo reer-magaalkaba. Waxaa ka dhalatay, inta haruur caska ee qooys ku heli karo mushqaayad maalmeedkiisa ama ri' dabaax ah oo uu iibiyay ayaa ka yaraatay marka la barbardhigo sanadii hore (Isweydaarsiga ayaa hoos u dhacay 44% iyo 37% marka loo fiirsho Bishii 12aad 2009, waa siday isugu xigaan). Isweydaarsiga u dhexeeya rida dabaaxa iyo bariiska oo sida badan ay cunaan ayaa iyan hoos u dhacday isla muddadaa, balse ka xad yar (5%).

Xaaladda nafaqada ayaa kasoo raynaysay tan iyo Gugii 2010, oo ka timid Ba'naan, ee Hawdka, iyo heerarka Aad u Ba'an ee Cadduunka, oo Halis ah. Waxaa sababay helidda caanah iyo subagga ee kordhay, ka dib markii ay habnololeedyada Hawdka iyo qaybo ka mid ah Cadduunka ay heleen Gu' aad u wanaagsan 2010; uguna darsanatay helitaankii mucaawanada samofalka (caafimaadka, nafaqo waaagsan, WASH - Biyo, Nadaafad iyo Faydhowr). Taa ka sokow, horumarkani ayaa la sadaaliyay inuu muddo gaaban yahy, uguna wacan tahay abaarta hadda ka jirta dhulkaa. Xaaladda Deexda ayaa kasii daraysa oo awal ahayd mid Halis ah, hadana u badan tahay Ba'naan. Xaaladda sugnaanta cuntada oo kasii daraysa, nuglaanshaha oo sii kordhaya una sabab ah nabadgalyo darrida iyo barakac aan kal joogsi lahayn, gargaar banii'aadminimo oon jirin, caanaha oon la helin Deexda iyo Digir Tacbatada; ooy wehliso cudurro badan, ayaa ah waxyaalaha sii bi'inaya xaaladda.

***Waqooyibari***

Xaaladda sugnaanta cuntada ee habnololeeyada goboladda Waqooyi bari (Bari, Nugal iyo waqooyiga mudug) way sii xummatay iyadooy ugu wacantahay xilli roobaadyo isku xiga oo xumaaday. Tirada guud ee dadaka tabaalaeysan ee gobollada Waqooyi Bari waxay korodhay boqolkiiba shan(5%) marka loo eego tiradii Guga ee la soo dhaafay. Tirada dadka tabaalaysan waxa lagu qiyaasay 220,000 qof oo 190,000 qof (86%) ay ku jiraan Xaalada (DCHB) halka ay 30,000 (14%) oo qof ay ku jiraan xaalad Gurmad binaadanimo (GB). Dadka tabaalaysani waxay ugu badan yihiin dulka miyiga(130,000 Qof) oo ka mid yiihiin reerguuraga caydhoobay xilliyadii hore (9,000 Qof) dadak tabaalaysan ee magalooyinka ku sugan waxa lagu qiyaasay 90,000 qof. Meelaha ugu daran ee xaaladu noloshu ay aad u xumaatay xillaga Deyrta waxa weeyee deegaanada deexda, iyadoo tirada dadka tabaalaysani ay laban laabmeen. Haseyeeshee, xaaladda nolosha Hawdka ee gobolka Nugal ayaa soo yara hagaagtay ka dib markii roobab dhexdhaad ahi heleen bishii October.Guud ahaanse xaaladda nolosha ee Habnololeedyada Hawd iyo Caduun ee gobollada Mudug iyo Nugal ayaa ah Gurmad biniaadnimo (GB). Xaaladda nolosha ee Dooxada Nugaal, Karkaar/Dharoor iyo Soolka waxay ay tahay (XSC) oo u sii xumaanaysa Dhibaatada Habnololeed iyo Cunno Ba'an (DHCB). Habnololeedyada Golis/Gabi ee Gobolka Bari weli waxay ku jiran DHCB oo u sii xumaanaysa Halis dhexdhexaad ah inay galaan GB iyaddoo saddex xilli robaad ay xumaadeen oo saameeyey wax soo saarkii beeyada iyo dakhligii ay dadku ka heli jireen.



*Ari iyo Ido xaaladdoodu Liidato, Tuulada Rembanti, Garoowe, Nugaal, FSNAU, Bisha 12aad 2010*

Waxayaabo fara badan oo iskaalmaystay ayaa saameeyey xaaladda sugidda cuntada ee gobolada waqooyi Bari Deyrta dabadeed, oo ay ka mid yihiin, daaq xumo, biyo yari, taaso keentay in jimidhka xooluhu aad u xumaado, caanuhuna yaraadeen, haynta xoolaha ee heer qoys oo yaraatay iyo qiimaha biyaha oo kor u kacay (80% Nugal iyo 61% Bari -marka loo eego December2009). Waxa kale oo hoos u dhacay hawlihii kaluumeysigs ee habnolleedka Deexda, oo ay u ugu wacantahay budcadbadeeda iyo xoolaha oo aad u dhintay oo u yaraaday marka loo eego hayntii xiligii guga ee hore. Arrintani waxay keentay in tirda dadka tabaalaysani ee Deexda ku nooli ay aad u kordho. haya'da. FSNAU waxa ay ka sameyn doonta Deexda daraasad qoto dheer si loo heli macluumaad dheeraaad ah si loo heli xogo dheeraad ah oo la xidhiidha sida ay u waajahaan nolosha dadkii xoolaha iyo dakhligu ka yaardeen.

Qiimaha firida ayaa kor u kacayey ilaa bishii December2009, qiimaha Bariisku waxa uu kacay boqolkiiba 18, halka hadhuudhka casi isna uu kacay boqolkiiba 6. Prices of cereals have also increased since December 2009, by 18 percent for rice and 6 percent for red sorghum. Haseyeeshee, kicista qiimaha firada ee gobollada waqooyi Bari way ka hoosaysaa kuwa goboolda dhexe iyo koofurta, iyadoo ay u sababtahay qaybinta Cuntada gargaarka ee gobollada Waqooyi Bari. Kor u kaca qiimaha firidu waxay sababtay inuu hoos nu dhaco isku bedalasha firida iyo xoolaha (17Kg/ neefka) kaasoo hoos u dhacay boqokiiba 14 marka loo eego bisha Decmber2009.

Xaalada nafaqada ee habnololeedyada Buuralayda iyo Hawdba waxay u haggaagtay mid ladifan (serious), halka xaaladda nafaqada ee habnololeedaka Cadduunka ay ka soo hagagtay mid aad u halis ah xilligii Guga ee hore noqotayna mid halis ah. Xaaladda nafaqo ee habnololeedka Soolka waxay la mid tahay tii Gugii hore oo ah mid digniin ah.

***Waqooyigalbeed***

Xaaladda sugnaanta cuntada ayaa soo wanaagsanaatay dhulka beer-xoolodhaqatada Waqooyigalbeed ka dib markii la goostay dalag aan caadi ahayn oo wanaagsan Gu'/Karantii 2010 iyo weliba qaar ka mid ah habnololeedkyada xoolodhaqatada sida Hawdka Hargeysa iyo Golis-Gubanka galbeed, oo iyaga helay roobab Deyr oo caadi ah. Hadda wadarta dadka iyagu dhibban ee Waqooyigalbeed ayaa lagu qiyaasay 120,000 qof, oo ah koror 60 boqolkiiba dadka dhibban tan iyo Gugii 2010. Waxaa tirada dadka tabaalaysan ka mid ah, qiyaastii 30,000 qof ayaa ku jira GB, Halka 90,000 qof ay ku jiraan DHCB. Wax iyar ka badan kala bar (54%) dadka tabaalaysan ayaa ku nool dhulalka miyiga. Oogada Sool ayaa weli ku jirta wejiga GB uguna wacan tahay waxyeelada abaarta hadda jirta. Habnololeedyada xoolodhaqatada Hawd, Dooxada Nugaal iyo Golis/Gubanka bari (degmooyinka Ceelafweyn iyo Ceerigabo) ayaa ku jira XSC oo weliba Halis Aad ah ugu jira inay sii xumaato ooy galaan DHCB. Goliska Bari ee degmada Laasqoray (Sanaag) ayaa lagu sifeeyay DHCB oo weliba Halis Dhexdhexaad ah ugu jira inay sii xumaato ooy galaan GB. Dhammaan dhulka beer-xoolodhaqatada ayaa kusii jira XSC tan iyo Gugii 2010 ka dib.




*Biya Dhaamis Wakhtigiisii ka Soo Hormaray, Hawdka, Bisha 12aad 2010*

Xaaladda sugnaanta cuntada ee dhulka xoolodhaqatada Waqooyigalbeed ayaa muujinaya isbeddello kala duwan. Hawdka gobollada Togdheer iyo Sool, iyo weliba Dooxad Nugaal, Oogada Sool iyo Golis-Gubanka bari ayaa Inta badan sii xumaatay ka dib markii roobabkii Deyrta ee xumaaday saamaysay, oo si xun u saamaysay xaaladda daaqsinka sababtayna biyo la'aan ba'an kordhisayna hayaankii. Biyo dhaamis ayaa goor hore ka billabmay habnololeedyada roobabka waayay ee Hawdka, Dooxada Nugaal iyo Oogada Sool sicirka biyuhuna waxay ka kordheen 150% sidii caadiga ahayd (0.2 USD to 0.5USD/jeerigaanka 20liitir). Saadaasha ayaa lid ah markii aad eegto muddada dheer ee xilliga Jilaalka oo habnololeedyada ay weli sii iibsanayaa biyaha booyadaha iyocuntada qaaliga ah waxay kaloo geli doonaan kharash dheeri ah oo la xiriira hayaanka. Baahiyadan ayay u badan tahay in lagu kafayn karo iyadoo la kordhiyo iibka xoolaha. Sidaa daraadeed, ariga ayaa la filayaa inuu ka yaraan doono heerarkii gundhigga bilaha soo socda. In ka badan kala bar xoolaha Oogada Sool ayaa ah waxaan iibsamayn oo yaryar ah oo jira lix bilood wax ka yar, sidaa daraadeed, qoysaska saboolka ayaa lagusoo warbixiyay inay iibinayaan xoolihii nacfiga lahaa ee dhalayay. Dhanka kale, habnololeedyada beer-xoolodhaqatada Waqooyigalbeed iyo habnololeedyada xoolodhaqatada ee Hawdka Hargeysa iyo Golis-Gubanka galbeed ayaa soo wanaagsanaada ka dib markii ay heleen roobab waxtarkoodu wanaagsan yahay, oo si wanaagsan wax u taray beeraha, daaqa, biyaha iyo xaaladda xoolaha. Heerka dhalmada riyaha iyo idaha ayaa hadda ah mid u dhexeeya sare iyo dhexdhexaad ee dhulkaasi, dhalmada geelana ayaa la rajaynayaa inay kororto Guga soo socda. Sicirka firida dalka ayaa 25-42% ka hoos martay sicirkii sanadii hore (Bishii 12aad 2009) dhammaan aagaas uguna wacan tahay sahayda firida ee taalla suuqyada oo korortay ka dib markii laga goostay firi aad u badan xilligii Gu/Karanta habnololeedyada beer-xoolodhaqatada (72,000MT of firi ah) iyo weliba waxa ka imanaya Itoobiya.

Sicirka riyaha dabaaxa ayaa aad u sarreeya gobollada intooda badan marka la barbardhigo muddo hal sano ka hor (Bishii 12aad 2009), halka sicirka firida dalka uu hoos u dhacay. sidaa daraadeed, awoodda wax iibsiga ee dadweynaha ayaa siyaadday dhammaan gobollada sida uu mujinayo nidaamka kala ganacsiga ee isweydaarsiga rida dabaaxa iyo haruurka. Si kastaba ha ahaatee, isweydaarsiga rida dabaaxa ah iyo bariiska ayaa muujinaya isbeddello kala duwan dhammaan suuqyada Waqooyigalbeed. Isweydaarsiga ayaa si aad ah u kordhay Burco iyo Booraame ugun wacan tahay sicirka rida oo kordhay sicirka bariiskana uu degganaa marka la barbardhigo Bishii 12aad 2009. Waxaase taa ka duwan, isweydaarsiga ayaa hoos u dhacay gobolka Sanaag (24%) uguna wacan tahay dalabka riyaha oo hooseeya oo hoos u riday sicirka iyo sicirka bariiska ee si dhexdhexaad ah u kacay (18% suuqa Ceerigaabo).

Xaaladda nafaqada ee gobollada Waqooyigalbeed ayaa ah wejiga Halis, marka laga reebo Oogada Sool oo ah Feejignaan. Oolidda caanaha ee habnololeedyada xoolodhaqatada oo soo koobmay, cudurrada oo sarreeya (ooy wehliyaan dhacdooyin shuban ka dib markii ay biyuhu ku yaraadeen dhulkaasi) ayaa ah waxyaalaha ugu waaweyn ee horseedaya. Helidda nhawlaha nadaafadda iyo biyo saafi ah ee ka yaraatay miyiga, ooy u wehliyaan quudinta iyo xannaanaynta carruurta si aan haboonayn ayaa iyana ah waxa xaaladda iminka sbabay. Sikastooy tahayba, kororka gargarka biniaadminimo ee gobollada (caafimaadka, quudinta, biyaha iyo nadaafadda), ooy ku jiraan maalinta caafimaadka ilmaha oo laga qabatay dhulkaa Bilihii 12aad 2010 iyo 1aad 2011, ayaa fududeeyay xaaladda.

**KHARIIDADDA 9: HAB-NOLOLEEDYADA KA JIRA SOOMAALIYA**




*Warbixinadii and daabacaadahii dhowaan soo baxay iyo kuwa soo bixi doona dhowaan*

*War Saxaafadeed-ka FSNAU, Bisha 1aad, 2011*
*Warbixin Xilliyeed-ka Cimilada ugu dambaysay ee FSNAU/FEWSNET, Bisha 2aad, 2011*
*Xogta suuqyada ugu dambaysay ee FSNAU/FEWSNET, Bisha 2aad, 2011*
*Taxanaha Farsamo ee Xaaladaha Nafaqada ee FSNAU, Bisha 2aad, (soo bixi doona dhawaan)*
*Taxanaha Farsamo ee Falanqayta Xilliga Dayr-ta Dabadii, Bisha 2aad, 2011 (soo bixi doona dhawaan)*

*OGEYSIIN: Warbixinnada iyo war-saxaafadeedyada dusha ku qoran waxaa laga heli karaa shabakadda FSNAU ee: www.fsnau.org*

Technical and Managerial Support

Funding Agencies